

## Tilmaamaha Ku Aadan Is-qiimaynta Kormeeraha Guud

Iyadoo gundhig u ah is-qiimayntan, waxaan aqoonsaday mabaadi'l gaar ah oo ay tahay in lagu qiimeeyo xafiiska Kormeeraha guud. Mabaadi'daani waxay xog ku biiriyeen go'aan qaadashadayda waxayna ku qotomaan hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee la xiriira moodhelka Maamulka Siyaasadda ee uu qaatay Guddigu:

1. Kormeere guud ahaan waxaan u dhaqmay si waafaqsan aaminaadda ah in Guddigu uu qiimayn ku samayn doono wax-qabadkeyga iyagoo lagu salaynayo shuruudaha cad ee lagu qeexay siyaasadda Guddiga;
2. Ficaldayda ka Kormeere guud ahaan waxay ahaayeen kuwo waafaqsan fahamka ah in Guddigu uu xafiiska Kormeeraha guud siiyey xaqa ah inuu doorto turjumaad kasta oo macquul ah ee siyaasadahaas, iyadoon loo eegin cadaadis dibadda ah oo ay Guddigu la kulmayaan;
3. Waxaan taageerayaa, dhiirigelinayaa, oo aan bogaadinayaa sida ay guddiga uga go'an tahay Siyaasad Maamul Wanaag ah. Waxaan si dadaal ku jiro uga shaqeyay in aanan wiiqin hoggaanka Guddiga;
4. Marka la iigu yeero in aan xulashooyin ka soo saaro siyaasadda Guddiga, waxaan si cad u qeexayaa saamaynta xulashooyinkaas waxaana sidaas sameynayaa eex/janjeer la'aan. Marka aan la wadaagayo ra'yigayga, waxaan si cad u sheegayaa in ereyadaas ay yihiin fikradayda;
5. Marka aan macluumaad u diyaarinayo Guddiga, waxaan kala soocaa macluumaadka loo isticmaali doono kormeerka, macluumaadka lagama maarmaanka u ah go'aan qaadashada guddiga, iyo macluumaadka lama filaanka ah si Guddigu uusan isugu khaldin noocyada kala duwan ee macluumaadka;
6. Marka la eego arrimaha la ii oggolaaday inaan go'aan ka gaaro, waxaan ku dadaalayaa inaan go'aan ka gaaro arrimahaas halkii aan go'aamadaas ku soo celin lahaa guddiga si ay iyaga go'aanka u gaaraan ama ay u ansixiyaan xulashadayda.

Anigoo mabaadiidan maskaxda ku haya, waxaan soo uruuriyay xogta hoose si ay guddiga u tixgaliyaan. 1

# Turjumaadda Iyo Caddeymaha Macquulka Ah Natiijooyinka La Gaaray

## RI.1 - Sinaanta

**Yoolka:** U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinkan waxa la gaari doonaa Sanad Dugsiyeedka 21/22 marka:

1. Ugu yaraan laba sistem loo aqoonsado in la baabi'yo oo ay ka mid tahay dib u habeynta Xafiiska Dhexe waxaana burburin lahaa dhowr kooxood oo kala duwan iyo xubno badan oo DPS ah. Tani waa halbeeg cabbireed oo macquul ah oo heerka  
guusha maadaama burburinta nidaamyadan ay ku lug yeelan doonaan dhowr kooxood oo kala duwan oo ka tirsan ururka/hay'adda waxaana laga yaabaa inay u baahdaan nidaamyadan in la beddelo isla markiiba haddii ay ku noqoto inay ku xirmaan xeerarka iyo/ama siyaasadaha gobolka. Dib-u-habaynta Xafiiska Dhexe, shaqaalaha waxaa loogu talagalay inay meesha ka saaraan kala qaybsanaanta iyo in ay bixiyaan agabka heer dugsi ah inta ay degmada ka soo kabanayso saamaynta cudurkii safmareenka ahaa.
2. Macallimiinta Midabka Leh iyo Macallimiinta Luuqadaha Badan waxa loo hayn doonaa si la mid ah macallimiinta kale ee DPS iyadoo lagu salaynayo xisaabinta haynta hordhaca ah ee ay sameeyaan Qeybta Maamulka Shaqada iyo Shaqaalaha marka la gaaro Sebtembar 2022. Kani waa cabbir iyo bartilmaameed macquul ah maadaama isbeddellada qaranka ay muujinayaan in macallimiintu ay shaqooyinka uga tagayaan heer naxdin leh.

**Sababta:** Tani waa turjumaad macquul ah oo loogu talagalay in qaab-dhismeedyada nidaameed loogu burburiyo qaab joogto ah. Waxay qaadatay qarniyo badan oo la soo sameeyey takoor iyo dulmi si loo abuurto nidaamka hadda jira ee aan ku shaqeyno kuna noolnahay. Waxay qaadan doontaa dadaal joogto ah oo ay sameeyaan dhammaan xubnaha shaqaalaha si ay u burburiyaan nidaamyadan iyo qaab-dhismeedyadan ku qotoman takoorka jinsiyadeed.

**Yoolka:** Oggaanshaha iyo burburinta nidaamyada joogtada iyo soo jireenka ah ee ka dhex jira nidaamka dugsiyadeena, iyo in dib loo dhiso khibrado arday, qoys iyo xubin kooxeed oo loo siman yahay.

1. Qaab-dhismeedka Maamulka Guddiga ee Loo aqoonsaday Burburinta
  - a. Guddiga waxbarashada wuxuu abuurey qaraar lagaga baxayo moodhelka maamulka ee uu ka koobnaa:

- i. samaynta qaraaro si loola xiriirka kormeeraha guud,
- ii. doorar iyo masuuliyado aan caddayn oo ka dhex jira Guddiga Waxbarashada iyo Kormeeraha guud iyo shaqaalaha,
- iii. filashooyinka wada xiriirka ee u dhexeeya shaqaalaha Kormeeraha guud iyo Guddiga Waxbarashada oo aan caddayn,
- iv. kala saacidda aan caddayn ee siyaasadaha maamula Guddiga Waxbarashada iyo siyaasadaha Maamulka Kormeeraha Guud, iyo
- v. Shuruudaha qiimaynta wax-qabadka kormeeraha guud oo aan caddayn joojtana ahayn.

2

### Talaabada Ka Dhalatay: *U-wareegitaanka Siyaasadda Maamulka*

- a. Qandaraas lala galay Ururka Guddiyada Dugsiyada ee Colorado si loo bilaabo doodaha ku saabsan foomka loo isticmaalayo in loo wareego Siyaasadda Maamulka.
- b. Iyadoo lagu taageerayo in Guddiga Waxbarashada ay u guuraan Siyaasadda Maamulka, Degmadu waxay shaqaaleysiisey Sarkaalka Maamulka kaas oo:
  - a. Ka caawiyey Guddiga Waxbarashada inay dejiyaan/sameeyaan buug-siyaasaddeedka bishii Nofeember 2021 si loogu daro:
    - i. Siyaasadaha Xiriirka Kormeeraha Guud iyo Guddiga
    - ii. Siyaasadaha Hanaanka Maamulka
    - iii. Siyaasadaha Dhamaadka/Filashooyinka iyo
    - iv. Siyaasadaha Xaddidaadaha Fulinta/Hawl-qabadka
  - b. Kasbaday Shahaadada Xirfadlaha Nidaamyada Maamulka Bishii Meey 2022 si uu khabiir ahaan ugu adeego Siyaasadda Maamulka
  - c. Guddiga waxbarashada ka caawiya arrimaha la xiriira u hoggaansanaanta siyaasadaha la qaatay
- c. Filashooyin isgaarsiineed u sameeyay Kooxda Hoggaanka Sare si ay ula jaanqaadaan/u waafajiyaan Siyaasadda Maamulka. Siyaasadda Maamulka hadda waa ajande si caadi ah looga hadlo inta lagu jiro kulamadeena Hoggaanka Sare. Hab-maamuusyada isgaarsiinta ayaa lala wadaagay SLT dhowr jeer iyo hadba markii loo baahday.
- d. Guddiga wuxuu hadda filashooyinka kala Kormeeraha guud iyaga oo isticmaalayo siyaasado qoran
  - a. Dejiyay filashooyin cad oo loogu talagalay qiimaynta kormeeraha iyada oo loo marayo natiijooyin la xiriira Siyaasadaha Dhamaadka/Filashooyinka iyo Siyaasadaha Xaddidaadaha Fulinta/Hawl-qabadka

### 2. Qaab-dhismeedka Xafiiska Dhexe ee loo aqoonsaday Burburinta:

- a. Habraaca Dhegeysiga iyo Waxbarashada, warbixinta ERS waxay muujisay caqabadaha soo socda ee ka jira xagga qaab dhismeedka xafiiska ee hadda jira ee u baahan in wax laga qabto:
  - i. Qaab-dhismeedka Go'an ee Qaybaha Xafiiska Dhexe

- ii. Hufnaan la'aanta ku aadan doorka dugsiyada iyo kooxaha xafiiska degmada
- iii. Taageerada dugsiyo xooga ma saareyso taageerada istiraatiijiyadeed ee ku hareeraysan mudnaanta ugu muhiimsan
- iv. Nidaamyada degmada ee xooggani si joogto ah uguma tarjumaan hab-dhaqameedyo dugsi oo xooggan
- v. Cadayn/hufnaan fiican ayaa loo baahan yahay si loo xalliyo taageerooyinka is dulsaaran, inta badana aan la isku dubaridin ee waaxyaha dhexdooda ah
- vi. Geedi-socodyada qorshaynta iyo miisaaniyadda ee sanadlaha ah hadda ma kordhinayaan sida agabyada loogu isticmaalo xarunta dhexe iyo dugsiyada

### Talaabada Ka Dhalatay: *Dib-u-Habaynta Xafiiska Dhexe.*

- a. Qaybaha Xafiisyada Dhexe waa la burburiyay waxaana lagu bedelay moodhelo cusub oo si fiican u waafaqsan tacliinta iyo dugsiyada. Intaa waxaa dheer, dugsiyada waxaa loo qaabeeyey Iskaashato Ahaan oo ka kooban noocyo badan oo qoysaska dugsiya ah si waxbarashada loo wadaago. Tani waxay caddayn dheeraad ah ka bixin doontaa doorka dugsiyada iyo kooxaha xafiiska degmada waxayna noo ogolaan doontaa inaan si wanaagsan uga wada shaqeyno dhammaan waaxyada si loo xalliyo dhibaatooyinka adag.
- b. Xafiiska Qorshaynta Istiraatiijiyadeed ayaa hadda lagu meeleyay Xafiiska Madaxa Shaqaalaha waxaana uu hadda la jaan qaadayaa Bayaanada Filashooyinka ee degmada kaas oo soo koobaya mudnaanta ugu muhiimsan ee degmada.
- c. Taageerada isdul-marsan ee ka dhex jirta waaxyaha xafiiska dhexe ayaa la xaliyay si loo helo caddayn/hufnaan wanaagsan.
- d. Qaab-dhismeedka cusub ee xafiiska dhexe ayaa lagu muujiyey shaxdan soo socota: [05.12.2022 Jaantuska Ururka/Hay'adda ED.](#)
- e. Waxaan isugu yeeray [Kooxda La-talinta Kala-guurka](#). Kooxdan oo ka kooban 60, oo ay weheliyaan saddex guddoomiyeyaal, waxay shaqaynayeen Oktoobar ilaa Diseembar si ay u aqoonsadaan [10 bayaano oo mudnaan ah](#). Kooxda Ku-meelgaarka ah waxay ku tiirsanaayeen fikrado ka soo baxay safar [Habraaca Dhegeysiga iyo Waxbarashada](#) oo aan qabtay bishii Luulyo ilaa horraantii Oktoobar. 10-ka bayaan ee mudnaanta ah ayaa hagi doona dadaalkayga wixii hadda kadib ah iyadoo degmadu ay ka shaqaynayso sidii loo hirgelin lahaa Khariidad Istiraatiijiyadeed.

### 3. Nidaamyada Waxbarashada Gaarka ah ee loo aqoonsaday Burburinta

- a. Ardayda ku jirta Baahida Waxtarka leh (AN) iyo goobaha Dugsiyada Gaarka Ah
  - i. Barnaamijaynta Baahiyaha Waxtarka leh

Anigoo ka jawaab celinaya tirada faraha badan ee ardayda Madowga iyo maariinka ah ee ku jira barnaamijka Xarunta AN, waxaan u ololeynayaa in lagu beddelo horumarinta xirfadeed ee macallimiinta kuwaas oo laga dhisayo xirfadaha ku aadan sida loola tacaalo dabeecadaha ardayda ee heerarka 1-aad iyo 2-aad. Intaa waxaa dheer, waxaan taageero dheeraad ah u qoondeeyey dugsiyada si loo qiimeeyo

baahiyaha ardayda iyada oo loo marayo IEP-yo iyo abuurista qorshooyin habdhaqaneed oo adag kuwaas oo u oggolaanaya ardayda inay barnaamijyada waxbarashada guud ku helaan jawi loo wada dhan yahay oo jawaab celin leh.

1. Waxaan garwaqsanahay in nidaamkani uu ahaa mid caburin leh sababaha soo socda awgood:
  - a Saamaynta oo aysan u sinnayn ardayda midabka leh ee Xarumaha LRE3 AN
  - b Tirada yar ee ardayda ka gudbaysa ama "ka joogsanaysa" AN ilaa M/M
  - c Heerarka qalin-jabinta, iyo/ama wakhtiga qalin-jabinta oo aan dheelitirnayn
2. LDT - Hannaanka Go'aaminta Goobta
3. Meelaynta Xarunta - guud ahaan – faraq ka jira xagga ka mid noqoshada dugsiga iyo u-bayla noqoshada asxaabta waxbarashada guud

ii. Barnaamijyada Dugsiyada Gooniga ah ee DPS

Waxaan joojiyay qandaraaskii lagula jiray Sierra ee Barrett waxaana abuuray Barnaamij Dugsiyeed Gaar ah oo Ay degmadu maamusho

1. Marka la eego waajibaadyada qandaraaska joogtada ah ee aan la buuxin taasoo keentay in barnaamijyo tayo yar ay helaan ardayda DPS ee dhigta Dugsiga Sierra ee Barrett iyo saameynta taban ee arrintaas ay ku yeelatay ardayda, waxaan soo jeediyay in la sameeyo barnaamij dugsi ii gaar ah oo ay degmadu maamusho.
2. Walaacyada gaarka ah ee ku aadan waajibaadyada qandaraaska ee aan la fulin waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn: isticmaalka hab-dhaqannada habboon ee xakamaynta, tababarka shaqaalaha caafimaadka maskaxda, maqnaanshaha/boosaska bannaan ee shaqaalaha, u hoggaansanaan la'aanta siyaasadda iyo habraacyada degmada, ka soo warbixinta maqnaanshaha/gembinta dugsiga, qiimaynta hanjabaadda, taageerada dhammaystirka buundooyinka/dhibcaha kiridhitka, dibloomada iyo ogeysiinta shaqaalaha ku habboon ee degmada walaacyada ku saabsan ardayada iyo barnaamijka.
3. Intaa waxaa dheer, qorshaha hadda ee barnaamijka ay maamusha DPS waxa ku jiri doona shaqaale dheeraad ah si ay u taageeraan baahiyaha gaarka ah ee ardaydan iyo si ay gacan uga geystaan yaraynta khatarta sharciyeed ka dhalan karta marka ay degmadu buuxin waydo waajibaadka meelaynta ee ardayda. Fursadaha waxbarasho ee dheeraadka iyo ula kac ah ee loogu talagalay shaqaalaha oo ay weheliyaan shaqada kooxda iyo dhaqanka barnaamijka waxay sidoo kale u baahan doonaan

kheyraad dheeraad ah si ay u taageeraan barnaamijyada tayada sare leh ee ardaydeena taas oo sababaysa u gudubka daryeelka heerka hoose.

4. Colorado waxay leedahay xulashooyin si joogto ah loo xaddiday si loo taageero ardayda u baahan daryeel heer sare ah. Degmadu waxay filaysaa 16 xarumood oo si toos ah loo isticmaali karo si ardayda ka socota degmooyinka gobolka oo dhan loogu soo gudbiyo.
5. Xarumaha, oo ay ku jiraan barnaamijyada daawaynta maalintii ah, waxay leeyihiin ikhtiyaar ay ku doortaan oo ay ku kushaan ardayda la meelaynayo kuwaas oo loo soo gudbiyay iyaga. Tani waxay keenaysaa dib u dhac ku yimaada in barnaamijyada ku haboon loo helo ardayda waxayna sababi kartaa in la diido FAPE. Intaa waxaa dheer, xarumaha dibeddu waxay awood u leeyihiin inay ogaadaan goorta ay ardayda fasaxayaan waxayna bixiyaan ogaysiis 30 maalmood ah oo keliya si degmooyinka ay u helaan meelayn ku haboon si ay u daboolaan baahiyaha ardayda. Ogeysiiskani wuxuu inta badan ardayda geliyaa khatarta ah inay noqdaan meelayn la'aan iyo kala guurka liita ee loogu gudbayo beddel kale.

#### **b. Farqiga Barnaamijyada ee [Qaybta 504](#)**

**Guudmarka:** Qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 waa sharci federaal ah. Waa sharciga xuquuqda madaniga ah kaas oo asaas u ah sinnaanta ardayda naafada ah wuxuuna diirada saarayaa takoor la'aan. Sharcigu wuxuu mamnuucayaa diidmada gelitaanka iyo ka qaybgalka barnaamijyada iyo hawlaha dugsiga ee ku salaysan naafanimada. Ardayda loo arko inay u qalmaan inay helaan fursad isku mid ah oo ay kaga qaybqaataan kagana faa'iidaystaan, waa inay helaan adeegyo iyo/ama qabanqaabooyin u dhigma kuwa ay helaan dhiggooda/ardayda asaagooda ah ee ku jira waxbarashada guud.

- i. Qaybta 504 waa sharci aan la maalgalin taasoo la macno ah in lagu maalgeliyo oo kaliya iyada oo loo marayo dhaqaalaha guud ee degmada mana jiraan ilo dhaqaale oo dheeraad ah oo soo gala degmada si loo taageero hirgelinta sharcigaas.
  1. Hogaamiyayaasha Dugsiga waxa loo xilsaaray inay FTE ku haboon ku soo daraan si loo taageero Waajibaadka Raadinta Iilmaha si markaa si habboon loogu raaco tilmaamaha habraaca, qorshaynta ula kac ah iyo taageerada Qaybta 504. Arrintani inta badan lama tixgeliyo lagumana arko codsiyada wax ka bedelka ee la sameeyo dayrta sidoo kalana lagu tixgeliyo qorshaynta bilowga ah ee FTE.
  2. Adeeg-bixiyayaasha Gaarka ah waxay taageeraan adeegyada iyagoo u maraya FTE-da dhexe. Ma jiraan geedi-socodyada hadda lagu taageerayo wax ka bedelka FTE ee jagooyinka dhexe iyada oo loo

marayo wax ka bedellada la sameeyo dayrta ama kheyraad dheeraad ah.

3. Hadda, degmadu waxay leedahay hal Takhasusle oo Qaybta 504 ah si uu u taageero dhammaan isku-duwayaasha Qaybta 504 ee dhammaan dugsiyada degmada. Si la iskugu xilqaamo in la xaqiijiyo hirgelinta ku habboon ee hannaanka Raadinta Ilmaha iyo Qaybta 504 loogana hortago takoorka, waxaa la tixgelin doonaa taageero dhexe oo dheeraad ah.

ii. Walaacyaad ka jira Fulinta Qaybta 504

1. Dhammaan isuduwayaasha 504 ma dhammayn tabobarkii Qaybta 504 ee isku-dhafka ahaa ee lagu qabtay goobta waxbarasho.
2. Dugsiyadu uma magacaabin laba isku-duwayaal oo shati haysta & dhismaha ugu yaraan 4 maalmood todobaadkii.
3. Dhammaan ardayda u qalma 504 ma haystaan shuruudaha habraaca - ogolaansho saxeexan, qiimaynta/dib u qiimaynta iyo kulan sannadeedka.
4. Ku guuldareysiga in loo qiimeeyo waxbarashada gaarka ah ama soo saarista Ogeysiiska Qoraalka ah ee Hore (PWN) iyo qiimeynta ardayga ku hoos jira Qeybta 504
5. Ardeyda waxaa la mariyaa MTSS si loo baajiyo ama dib loogu dhigo waajibaadka Raadinta Ilmaha
6. Ardeydu waxaa la mariyaa dugsiyada 'Pathways'
7. Siyaasadda guddiga dugsiyada ee hadda jirta waxay u baahan tahay in la cusboonaysiiyo si loo taageero dhaqanka la wanaajiyey iyo helitaanka waalidka ee xuquuqaha wali la sugayo ee hannaanka la xiriira.
8. Waalidka, ardayga, shaqaalaha iyo hoggaamiyaha dugsiyada fahamkooda ku aadan ujeedada iyo aasaaska Qaybta 504: Waxaa loogu talagalay ardayda naafada ah ee u baahan xuquuq siman oo ku aadan helitaanka iyo fursadaha waxbarashada, ee ma aha sare u qaadida kartida iyo waxqabadka wanaagsan. Haddii kooxuhu u ogolaadaan kooxuhu inay u taliyaan oo ay kooxaha ku cadaadiyaan adeegyo iyo qabanqaabooyin aan habboonayn, waxaanu saamayn taban ku yeelanaynaa sinnaanta ardayda oo dhan.

Intaa waxaa dheer, waxaan sii wadaa in aan aqoonsado oo aan baabi'iyoo nidaamyadii hore ee ay aqoonsadeen kuwii iga horreeyay kuwaas oo la jaanqaadaya Qaraarka Waxqabadka Sareeya ee Ardayda Madowga ah.

**Qaraarka Waxqabadka Sareeya ee Ardayda Madowga ah. (BER)**

**Nidaamyada soo socda ayaa loo aqoonsaday inay u baahan yihiin Burburin:**

1. Maskaxyada/fikradaha liidata ee u horseeda ficilada iyo dhaqamada si aan micne lahayn u saameeya ardayda Madowga ah - oo ay ku jiraan fikradaha ku qotoma eexashada kartida, hadiyadaha, awoodaha iyo waaya aragnimada maalinlaha ah ee ay ku leeyihiin degmadeena
2. Qaab-dhismeedyada iyo habraacyada hay'adaha ee sida xad dhaafka ah ugu aqoonsada ardayda Madowga tallaabada anshaxa ee 3-aad. Qaab-dhismeedyada iyo habraacyada hay'adaha ee sida aadka u hooseysa ugu aqoonsada ardayda Madowga ah waayo-aragnimada waxbarasho ee adag

**Jawaab:** Iyadoo la waafajinayo Qaraarka Waxqabadka Sareeya ee Ardayda Madowga ah (BER) iyo gacan looga geysanayo wax ka qabashada maskaxaha/fikradaha liita, kooxdaydu waxay dejiyeen waxyaabahan soo socda:

- Barashada joogtada ah ee eexda aan laga warhayn si loo baro dhammaan xubnaha Kooxda DPS waxyaabo ku saabsan habdhaqanada waxbarasho ee dulmiga ku salaysan iyo kuwa sinnaanta ku salaysan
  - Moodhiyuulada Khibrada Sinnaanta, Waxbarashada Kajawaab-celinta Dhaqanka, Xirfadaha DPS
- Qorsheynayaa Waxqabadka Sareeya ee Ardayda Madowga ah si loo:
  - Baaro waxna looga qabto fikradaha iyo dhaqamada dadka waaweyn ee sababa sii jiritaanka qaababka taariikhiga ah ee sinnaan la'aanta
  - Xoojinta Ka-qaybgalinta Qoysaska Madowga ah - oo ay ku jiraan Ardayda iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan ee Madowga ah
  - Natiijooyinka ka soo baxay Kooxda Waxbarashada ee BEP iyada oo loo marayo kulamo iyo Waraysiyo Dareen leh si loo aqoonsado hababka iyo xeeladaha ugu fiican ee sida ugu waxtar badan loo hirgelin karo

### Hindisaadaha iyo Taageerooyinka LGBTQ+

#### Nidaamyada soo socda ayaa loo aqoonsaday inay u baahan yihiin Burburin:

1. Aamussiinta taariikhiga ah iyo tirtirida aqoonsiga LGBTQ+ ee ka jira nidaamka dugsiga
2. Ka saarida ardayda LGBTQ+ iyo xubnaha kooxda ee nidaamka keydka xogta DPS, manhajka iyo kaabayaasha dhismaha dugsiga
3. Maskaxyada/fikradaha liidata ee u horseeda ficilada iyo dhaqamada si aan micne lahayn u saameeya ardayda LGBTQ+ ah - oo ay ku jiraan fikradaha ku qotoma eexashada kartida, hadiyadaha, awoodaha iyo waaya aragnimada maalinlaha ah ee ay ku leeyihiin degmadeena
4. Nidaamyada iyo qaababka hay'adaha ee aanan ahayn kuwo loo siman yahay jinsi ahaan, iyo kala duwanaanta qoyska

#### Jawaab:

- Samaynta doorka Maareeyaha Barnaamijka LGBTQ+ ee DPS
- Qiimaynta iyo cusboonaysiinta aaladaha keydinta xogta si loo aqoonsado dhammaan xubnaha kooxda
- Cusboonaysiinta Campus Infinite iyo foomamka diiwaangelinta si loo aqoonsado ardayda iyo qoysaska LGBTQ+



- Helitaanka kheyraadka manhajka oo la wanaajiyo
- Hagaajinta siyaasadaha iyo dhaqamada iyada oo loo marayo abuurista qalabka LGBTQ+ ee DPS
- Kordhinta muuqaalka aqoonsiga LGBTQ+ iyada oo loo marayo warbaahinta bulshada DPS, kheyraadka manhajka, iyo fursadaha dhismaha bulshada
- U gudubka HR-ka ee nidaamka Oracle waxaa ku jiri doona habraac la wanaajiyey oo loogu talagalay shaqaalaha ku jira kala-guurka waxaana lagu dari doonaa ugu yaraan 1 xulasho oo aqoonsiga jinsiga ah
- Sahanka caafimaadka ee la bixiyay Maarso 2021 ayaa siisay ardayda xulasho ay ku aqoonsadaan jiheyntooda galmo iyo jinsigooda markii ugu horeysay ee gudaha DPS. Su'aalo gaar ah oo LGBTQ+ la xiriira ayaa la weydiyay. Xogta la kala saaray waxay u ogolaanaysaa degmada inay isticmaasho xogta si ay u fahanto waaya aragnimada ardayda LGBTQ+ ah
- Hormarinta xirfadeed ee DPS SKILLS in la cusboonaysiiyo si muhiimada loo siiyo codka ardayda iyada oo la samaynayo dukumeentiyo (qiyaasta. taariikhda dhamaadka Diseember 22)

## Guudmar

Kooxdaydu waxay aqoonsadeen saddex nidaam oo waaweyn oo u baahan burburin. Nidaamyada Waxbarashada Gaarka ah ee la aqoonsaday waxay leeyihiin saddex nidaam-hoosaadyo. Tani waxay tirada guud ee nidaamyada loo aqoonsaday burburinta ka dhigeysaa ilaa shan (5). Waxay kala yihiin: sida soo socota:

1. Qaabka maamul ee guddigu wuxuu u wareegayaa Maamulka Siyaasadda
2. Dib-u-habaynta Xafiiska Dhexe si markaa si wanagsan loola jaanqaadsiiyo Siyaasadda Filashooyinka Guddida
3. Saddexda nidaamyada ee waxbarashada gaarka ah ayaa loo aqoonsaday inay u baahan yihiin burburin. Waxay kala yihiin:
  - a. Barnaamijyada Baahiyaha Waxtarka Leh ee ardayda
  - b. Barnaamij Dugsi oo Gooni ah oo loogu talagalay ardayda DPS iyo
  - c. Faraqa Ka Jira Barnaamijyada Qaybta 504

Ka sokow nidaamyada kor lagu sheegay, waxaan sidoo kale sii wadaynaa shaqada ah inaan baabi'inno nidaamyada ay aqoonsadeen kuwii iga horreeyay ee la xiriira Qaraarka Waxqabadka Sareeya ee Ardayda Madowga ah iyo Hindisaadaha iyo Taageerooyinka LGBTQ+.

## Kheyraadka Dheeraadka ah:

Macluumaad dheeraad ah oo ku saleysan talooyinka Daraasadda ERS waxaa laga heli karaa qaybtan.

Deyrtii hore, waxaanu la kaashanay Hay'adda Adeegyada Khayraadka Waxbarashada (ERS), oo ah hay'ad qaran oo caan ku ah khibradeeda maaraynta lacagaha dadweynaha ee degmooyinka dugsiyada, si ay qiimeyn ugu samayso ururkeena una aqoonsadaan sida aan si hufan uga

faa'iidaysan karno kheyraadka si markaa loo wanaajiyo waxbarashada. Waxaan kugu casuumaynaa inaad [halkaan ka akhrido Natiijooyinka ERS oo dhamaystiran](#). Natiijooyinkani waxay xog ku biiriyeen tallaabooyinkayaga ku saabsan dib-u-qaabaynta iyo qorshaynta isbarbar-socda. Qaar ka mid ah natiijooyinka muhiimka ah ayaa ah sida soo socota:

- **Dib ugu laabo oo dib u eeg aragtida ficilka** ee hagta go'aamada iyo ficillada DPS. Aqoonsashada dariiqooyin cad oo lagu gaaro guusha ardayda. Fursado ballaaran oo ay heli karaan ardaydeena danyerta ah. Khayraad badan iyo taageero wanaagsan in loo jiheeyo ardayda la kulma caqabadaha ugu daran.
- **Xoojinta Taageerada Dhexe ee isku xirka dugsiga.** Kordhinta isku xirnaanta degmada dhexdeeda ka jirta iyadoo la wanaajinayo xiriirka ka dhexeeya madaxda Xafiiska Dhexe iyo hogaamiyayaasha goobaha dugsiga. Hagitaan cad ayaa u sahlaya dugsiyada inay soo saaraan hal-abuur iyo horumar joogto ah.
- **Adkeynta Taageerada Dhexe ee dugsiyada iyadoo la xaqiijinayo in agabyadu ay la jaanqaadaan mudnaanta ugu sareysa.** Yareynta mudnaantayada. Haddii wax walba ay noqdaan isku muhiimad, ma jirayaan wax mudnaan leh.
- **Tallaabo dheeraad ah qaadis si deeqaha loogu qeybiyo si siman si loo gaaro sinnaanta ugu heerka sareysa ee ardayda heli karaan.** Raadi (oo la soco) sinnaanta xagga qaybinta kheyraadka ee u dhexeeya dugsiyada iyo dugsiyada dhexdooda.
- **Qeex rajada ah in qorshooyinka horumarinta heer dugsi ay wax ka qabtaan oo ay gacan ka geystaan yoolalka heer degmo.** Qaadashada/dhaqangelinta habkan waxay horumarin kartaa iskaashiga waxayna kor u qaadi kartaa horumarinta joogtada ah ee nidaamka guud.
- **Dib u habaynta shaqaalaha Qeybta Taageerada Dhexe si hawluhu si adag uugu xirnaadaan ujeedooyinka siyaasadda Guddida Waxbarashada.** Foomku waa inuu raacaa shaqada.
- **Kharashaadka dugsiga iyo Qeybta Dhexe waafaji mudnaanta degmada ee Guddiga uu ansixiyay.** Xaqiiji in Bayaanada Filashooyinka ee [Guddigu ansixiyey](#) inay noqdaan barta xudunta u ah kharashyada Qeybta Taageerada Dhexe iyo Dugsiga.
- **Si nidaamsan uga qaybgeli bulshada samaynta miisaaniyada iyo saadaalinta miisaaniyada.** In sidaas la sameeyo waxay u horseedi kartaa in faham baahsan laga helo – gacan laga gaysto - go'aannada adag.

## RI.2 – Wax Barida iyo WaxBarashada

**Yoolka:** U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doonaa 21/22 marka:

1. Dib-u-hagaajinta Khadadka aasaasiga ah, Qiimaynta Toosan, waayo-aragnimada waxbarasho ee si wanaagsan loo soo koobay ee ardayda
  - a. Dib-u-dhisida aasaaska sanad dugsiyeedka 2021-22 si aan u dejiyo yoolalka ka-qaybgalinta iyo guusha si ay ardaydu heer-fasalka guul uga gaaraan iyo wixii ka sareeya xilliga Imtixaanada Gobolka Colorado, oo ay ku jiraan CMAS, CSLA , READ Act iyo COSAT. Hadafkani waxa uu dib u soo celinayaa awooda degmadu u leedahay in ay dejiso yoolal macno leh oo la cabiri karo si ay ardayda u guuleystaan.
  - b. Bilaw qorshaha lagula soconayo waxqabadka ardayga inta lagu jiro sanadka oo dhan iyadoo la isticmaalayo imtixaano la jaanqaadaya heerarka gobolka si loo muujiyo in ardaydu ku socdaan wadadii ay ku gaari lahaayeen yoolalka heerka fasalka ee xagga xisaabta iyo akhris-qoraalka; Tani waa heer macquul ah oo guulgaaris ah maadaama degmadu ay lumisay awooddii ay ku odorosi lahayd waxqabadka ardayda sababo la xiriira saamaynta COVID-19.
  - c. Waayo-aragnimo waxbarasho oo si fiican u dhisan in loo sameeyo ardayda.
2. Xaqiijinta in dhammaan MLL-yadu ay helaan Barashada luqadda-hooyo oo tayo-sare leh, Horumarinta Luuqadda Nuxurka iyo Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee Isku-dhafan sida lagu muujiyey dib-u-eegista barnaamijka ELA. Kani waa cabbir macquul ah maadaama ay tahay habka ugu hufan ee lagu cabbiro u hoggaansanaanta Wareegtada Oggolaanshaha Wax Laga Badalay.

### Agoosto (RI.2)

TP1.2.1 Sameey Gundhigga % Aqoonta Xisaabta: CMAS, Fasalka 3-8	1.2.1a) Dhammaan Ardayda	29%
	1.2.1b) Ardayda Madowga ah	15%
	1.2.1c) Ardayda Latinx-ka ah	14%
	1.2.1d) Ku jira barnaamijka MLL-yada	9%
	1.2.1e) Ardayda Naafada ah	5%

	1.2.1f) Dhammaan Ardayda	31%
TP1.2.1	1.2.1g) Ardayda Madowga ah	19%
Sameey Gundhigga % Cabbirka Xisaabta: COSAT Fasalada 9-11	Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022 1.2.1h) Ardayda Latinx-ka ah Aan Khuseyn 1.2.1i) Ku jira barnaamijka MLL-yada 3% 1.2.1j) Ardayda Naafada ah 5%	17%
TP1.2.1) % Aqoonta Heerka Fasalka Fasalada K-3	1.2.1k) Dhammaan Ardayda	60%
	Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022	48%
	1.2.1l) Ardayda Madowga ah Aan Khuseyn	48%
		47%
	1.2.1m) Ardayda Latinx-ka ah 1.2.1n) Ku jira barnaamijka MLL-yada 1.2.1o) Ardayda Naafada ah	28%
	1.2.1p) Dhammaan Ardayda	38%
TP1.2.1	1.2.1q) Ardayda Madowga ah	26%
Sameey Gundhigga %	Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022 1.2.1r) Ardayda Latinx-ka ah N/A	23%
Aqoonta Akhris- qoraalka: CMAS, Fasalka 3-8	1.2.1s) Ku jira barnaamijka MLL-yada	13%
TP1.2.1	1.2.1t) Ardayda Naafada ah 7% 1.2.1u) Dhammaan Ardayda 50% 1.2.1w) Ardayda Latinx-ka ah 36%	

Sameey Gundhigga % Cabbirka: COSAT  Fasalada 9-11	1.2.1v) Ardayda Madowga ah 41% Dib u sameey Akhriska iyo Qorista Caddaynta Ku Salaysan (EBRW) 1.2.1x) Ku jira barnaamijka MLL-yada 9% 1.2.1y) Ardayda Naafada ah 14%  Aan Khuseyn  gundhigga 2022	
--	---	--

## Guudmar

Kooxdaydu waxay sameeyeen gundhiyo cusub oo loogu talagalay Cabbirada Colorado ee Guusha Waxbarashada (CMAS) Xisaabta iyo Akhriska ee fasallada 3-8, SAT iyo PSAT ee fasallada 9-11. Cabbirka Colorado ee Guusha Waxbarashada (CMAS), aqoonta guud ee degmada ee xisaabta 3aad-8aad (ardayda buuxiyey ama dhaafay filashooyinka) waa 29%. Aqoonta akhris-qoraalka fasalka 3aad-8aad, aqoontu waxay ahayd 38%. Sida shaxda kore ku cad, Ardayda Madowga, Latinx-ka, kuwa ku jira barnaamijka ardayda luqadaha badan ku hadla, iyo ardayda naafada ah waxay lahaayeen aqoon hooseysa oo CMAS ah marka loo eego degmada guud ahaan xagga xisaabta iyo akhris-qoraalka labadaba, taas oo muujinaysa in farqiga uu ka sii jiro xagga guusha ardayga ee CMAS ee kooxaha taariikh ahaan aan loo adeegin.

CO P/SAT ee fasalada 9-11 ee xisaabta, aqoonta guud ee degmadu waxay ahayd 31% ee ardayda buuxiyey ama dhaaftay cabbirkii xisaabta iyo 38% ee xagga akhris-qoraalka. Si la mid ah CMAS, farqi ayaa weli u dhexeeya kooxaha ardayda ah. Sida jaantuska uu muujinayo, isu-dheellitirnaan la'aan/farqi ayaa ka dhex jira ardayda midabka leh, ardayda MLL, iyo ardayda naafada ah marka loo eego xagga xisaabta iyo akhriska iyo qoraalka taas oo ku salaysan caddayn.

Marka la eego Imtixaankii Hore ee Akhris-qoraalka READ Act ee loogu talagalay fasallada k-3, shaxda sare waxay dejinaysaa gundhigga 2022 ee dhammaan ardayda kaas oo ah 60%. Ardayda madowga, ardayda Latinx-ka ah, ardayda ku hadla luqadaha badan, ama ardayda naafada ah ee helay heerar aqooneed oo ka hooseeya heerarka ardayda kale.

Diiradayada sannad dugsiyeedka 2021-22 waxay ahayd in la sameeyo gundhiga sannad dugsiyeedka mustaqbalka. Waxaan diirada saaraynaa inaan dejino gundhig, iyo wanaajinta natiijooyinka anagoo isticmaalayna kobcin la dedejiyey ee Ardayda madowga, Latinx-ka, Dhalad Maraykan ah, MLL-yada, ardayda naafada ah, iyo ardayda kale. Waxaan rumaysanahay in Qorshaha Istaraatiijiyadeed uu ahaa ujeedo la dhisay iyadoo dhammaan arrimahan maskaxda lagu hayo, wuxuuna si fiican gacan uga geysan doonaa si wax looga qabto waxqabadka tacliimeed ee hooseeya iyo farqiga u dhexeeya dhammaan kooxaha ardayda. Kooxdayda iyo anigu waxaan ogaanay in aqoonta akhris-qoraalka ay ka sarreyso aqoonta xisaabta waxaana arrintaan wax uga qabanaynaa qorshaha waxbarida ee dugsiyada.

DPS si ay u xaqiijiso horumarka degdega ah ee dhammaan ardaydeena ku kala jira dugsiyadeena, waxaan ku celceliyey oo aan adkeeyey muhiimada ay leedahay 1) jawi amaan ah oo soo dhawayn leh; iyo, 2) qoraalada iyo hawlaha heerka fasalka ah. Ardayda si ay guul uga gaaraan heerka

fasalka ama wixii ka dambeeya, waxaan garwaaqsaday in naqshadaynta iyo bixinta casharrada/shaqada heerka fasalka iyadoo la isticmaalayo jawi ammaan oo soo dhawayn leh ay muhiim tahay. Xafiiska Dugsiyadu waxa uu taageerayaa dhammaan waaxyada Tacliinta, Kormeerka Dugsiga iyo Taageerada Dugsiyada si dugsiyada la isu waafajiyo oo diiraddana loo saaro labadan barroosin.

Heer aad u faahfaahsan, waan ogahay in degmadu ay u baahan tahay in ay hesho dheelitirnaan u dhaxaysa diiradda saarista akhris-qoraalka, xisaabta iyo qaybaha kale ee taageera habka guud ee waxbarista carruurta. Waxaa jirta shaqo badan oo u baahan in la qabto gaar ahaan xagga xisaabta. Waa in aan xoogga saarno sii wadida adkeynta fulinta hawlaha, ku riixida ardayda caqabado wax soo saar leh iyo horumarinta macalimiin leh aqoon, xirfad iyo maskax si ay ardayda ugu caawiyaan qaabkaas. Degmadu waxay dib u dhisi doontaa waxbarid luqadeed oo cad iyo kala qeybinta barashada luuqadda ee fasal kasta. Habkani wuxuu MLL-yada u caawin doonaa qaabab badan oo macno leh, oo dhamaan ardayda ayaa ka faa'iidayaan doonaan.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in xogtayada CMAS, COSAT, iyo READ Act aysan gaarin halka ay degmadu rabto inay gaaraan, Degmaduna waxay ka shaqaynaysaa sidii ay wax uga qaban lahayd guud ahaan heerarka waxqabad iyo farqiyada lagu arkay guud ahaan ardayda la haybsoocay. Isla mar ahaantaana, xogtu maaha mid la yaab leh. Waxaa muuqata in waxqabadyada ardayda xilligii la galaayay cudurka safmareenka ah aysan gaarsiisanayn meeshii loo baahnaa, iyo in masiibadaas ay ka sii darsiisay xaqiiqadaas. Waxaan ku kalsoonahay in Qorshaha Istaraatiijiyadeed uu noo oggolaan doono inaan gaarno guulaha loo baahan yahay si aan wax uga qabanno waxqabadyada hooseeya ee laga helayo imtixaanada caadiga ah.

## RI.3 - Badqabka Ardayda iyo Shaqaalaha

**U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doonaa 21/22 marka:**

1. 85% dugsiyadu ay magacaabaan manhajka SEL ee cad.
2. Degmadu ay samayso gundhig ayna aragto horumarka laga sameeynayo imtixnaada ardayda iyo macalimiinta ee BESS ee dayrta ilaa guga. Imtixaankan waxa bixin doona dugsiyadu saddex jeer sannadkii.
3. % xubnaha shaqaalaha ee soo sheegay badqabka ah ama ka sareeya cabbirka 7 iyadoo la isticmaalayay cabir 0-10 ayaa kordhay dayrta ilaa guga.
4. Xarun kasta oo bulsheed waxay leedahay liis adeegyo ah oo loogu talagalay ardayda si ay u taageeraan badqabkooda, ardayduna waxay soo sheegaan in adeegyadu daboolayaan baahidooda

1.3.2 Sameey gundhigga % ee imtixanada ardayda iyo macalimiinta ee BESS kuwaaso <b>ka soo wareegay Heerka Sare xilligii dayrta isla markaana noqday mid Caadi ah xilligii guga</b>	Guud ahaan	Aan Khuseyn Aan Khuseyn	45.0%
	Ardayda Madowga ah	goobta	42.9%
	Ardayda Latinx/Hisbaaniga ah	Aan Khuseyn gundhigga 22	46.2%
	Ardayda Naafada ah	Aan Khuseyn	50.0%
	Ardayda ku jirta barnaamijka MLL	Aan Khuseyn	46.1%
		<b>Janaayo 2022</b>	<b>Meey 2022</b>
	1.3.3a) Dhammaan Shaqaalaha	6.4 6.2	6.2
1.3.3) Your Voice/Fikradaada/Ra'yigaaga	1.3.3b) Shaqaalaha BIPOC	5.6 5.4	6.7
celceliska cabbirka ee 0 ilaa 10	1.3.3c) Is-aqoonsaday	Shaqaalaha LGBTQ+ ah	6.2 6.0 6.2
		1.3.3d) Macalimiinta	6.0 5.8 6.0
		1.3.3e) Hogaamiyayaasha Dugsiyada	5.5 5.3 6.3

## Guudmar

Sannadkan waxa uu ahaa mid ay degmadu ay aragtay tiro badan oo arday ah oo u baahan taageero maskaxeed, jireed iyo shucuureed oo dheeraad ah markii ay ku soo noqdeen fasalka iyo dhismayaasha dugsiga. Tani waa sababta dhammaan dugsiyadeenna looga codsaday inay ka qaybqaataan ugu yaraan 20 daqiiqo oo SEL ah maalintii iyo in waxbarashada noocaas ah lagu dabaqo jadwalkooda sare. Xogta gundhigga ah ee lagu soo aruuriyay sahanka BESS waxay siisay degmada aragti ku aaddan meelaha ifaya ee dugsiyada gaarka ah, iyo faham wanaagsan ee ku aadan manhajka iyo/ama xeeladaha lagu dhisayo jawaab celin adag oo ku aadan baahiyaha ardayda.

Xogtan aasaasiga ah waxay sidoo kale noo ogolaatay inaan la shaqayno dugsiga si aan u taageerno dadaallada iyo hal-abuurada lagu dhisayo habdhaqanka wanaagsan ee dugsiyada dhexdooda lagu isticmaalo, iyo sidoo kale inaan si cad u fahanno kooxaha ardayda ka mid ah ee u baahan taageerooyin dheeraad ah oo ku salaysan dadaalka.

Kooxda Hoggaanka Sare waxay dejiyeen gundhigga % ee imtixaanada ardayda iyo macallimiinta BESS ee ka gudbiya qaybta "Sareeya" ee xilliga dayrta 2021 una gudubta qaybay qeybta "Caadiga" xilligii Guga 2022. Xogtan gundhigga ah waxay tilmaamaysaa in guud ahaan, aan filan karno in 45% ardaydeenna ay ka gudbi doonaan qaybta Sareysa ee dayrta una gudbi doonaan qeybta Caadiga xilliga gu'ga. Intaa waxaa dheer, kooxdu waxay dejisay isbeddel togan oo loogu talagalay % xubnaha shaqaalaha ee soo sheega badqabka cabbirka 7 ama wax ka sarreeya ah ee cabbirka 0-10 maadaama kor u kac ku yimid dayrtii ilaa guggii iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka ka soo baxay sahankii "Codkaaga/Tu" Voz". Waxaan filayaa in dib-u-habaynta dhawaantan la sameeyey ay saameyn ku yeelatay natiijooyinka sahanka taasoo keentay in celceliska "Dhammaan Shaqaalaha" ay sideedii hore sii ahayd laga soo bilaabo Dayrtii ilaa Gu'ga.

### Guud ahaan, dhammaan tallaabooyinka warbixinta kormeerka waa la fuliyay.

1.3.1a) Tirada dugsiyada leh manhajka SEL ee la aqoonsaday	Degmadu Maamusho	85% 33%	100%

### Boqolkiiba boqol ee dugsiyada ay maamusho degmadu waxay manhajka SEL ku aqoonsadeen UIP-yadooda 2022-23, taasoo caddaynaysa in yoolkan filashadiisa la dhaafsiyey.

Kooxda TSEAL ee degmada waxa ay maalin walba agabyo waxbarasho oo cad siinayaan dhammaan dugsiyada, degmadana waxa ay wadaagaysaa agabka manhajka sida Is-waafajinta dugsiyada hoose iyo Talaabada Labaad, Wajahida Taariikhda, iyo Iskaashiga Awooda ee dugsiyada dhexe iyo sare. Haddii dugsiyadu isticmaalayaan kheyraad kala duwan, waxay taasi ku aqoonsadeen UIP-ga. Tababarayaasha TSEAL waxay sidoo kale dugsiyada ka taageeraan hirgelinta manhajkooda haddii ay isticmaalayaan manhaj hore u jirey.



## RI.4 - Caafimaadka iyo Badbaadada

### U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doonaa 21/22 marka:

1. Degmadu ay 100% ku jirto u hoggaansanaanta waajibaadka tallaalka Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo Deegaanka ee Denver (DDPHE).
2. Degmadu ay la socoto heerarka tallaalka ee ardayda iyo dadka waaweyn iyadoo la raacayo tilmaamaha CDPHE iyo CDC si loo yareeyo fiditaanka cudurka
3. Degmadu ay dib u dejis gundhig loogu talaglaay Hakinada Ka Baxsan Dugsiga iyada oo tirada aan ka badnayn jadwalada 2018-19 sida ay qiyaaseen kooxda Anshaxa Ardayda (Warbixinta Kormeerka ee La Soo Saaray Juun 2022)
4. Degmadu xaqiijiso in gelitaanka waxbarashada qof ahaaneed ay ahaato mudnaan hadba marka ay xaaladaheenna caafimaad ee markaas jira noo oggolaadaan.
5. Degmadu waxay ka faa'iidayataa taageerooyinka kale sida agabyada si dugsiyada ay u sii furnaadaan. (Shaqaalaha Xafiiska Dhexe ee dugsiyada, Hawlgalayaasha Ganacsiga iyo Bulshada oo loo isticmaalo agab ahaan, iwm.)

<p>1. Saamaynta COVID laga yareeyo labadaba goobta waxbarashada ardaydeena iyo goobta shaqada macallimiinta iyo shaqaalaha, maadaama aanu si dhow ula shaqayno maamulka caafimaadka deegaanka iyo gobolka 100% u hoggaansanaanta waajibaadka talaalka DDPHE, La socodka heerarka talaalka shaqaalaha bedelkii la kormeerii lahaa faafitaanka cudurka ayaa</p>	<p>Magaalada iyo Degmada Denver ayaa soo saartay amarka caafimaadka dadweynaha ee u baahan in tallaalka la qaato bishii Agoosto 2021. Ugu dambayn Nofeember 2021, 97.6% waa u hogaansameen. 2.4% ee kale ee shaqaalaha ah waxay la kulmeen edbin horusocod leh oo loogu talagalay in shaqaalaha loogu dhaqaajiyo xagga u hoggaansanaanta. Kooxaha HR-ka waxay bixiyeen marin u helka kheyraadka sida isticmaalka internetka ama tignoolajiyada si ay u dhamaystiraan soo gudbintooda ama qabanqaabada ay codsadeen. Turjumaano ayaa diyaar laga dhigay xilliga munaasabadaha shaqsiyeed si ay u taageeraan dadka ku hadla Isbaanishka. Xubnaha kooxdu waxay aadeen goobo badan si ay waraaqo uga soo ururiyaan shaqaalaha aan heli karin gaadiid kale.</p>	<p>Degmadu waxay bixisay wadar ahaan 15,418 oo irbado tallaalka ah, taas oo u adeegaysay dad gaaraya 8,874 oo shaqaale iyo arday ah. Tallaallada ayaa lagu bixiyay 17 Rugo Caafimaad ee Dugsiyada ku Yaala, 11 Rugaha Caafimaadka Dadweynaha ah, iyo 10 Dugsi oo DPS ah.</p> <p>Laga soo bilaabo Jannaayo 2022, heerka tallaalka qaadashada ardayda DPS wuxuu ahaa 43% oo si dhamaystiran loo tallaalkay iyo 7.7% oo qayb ahaan loo tallaalkay.</p> <p>Anaga, ka shaqaale DPS ahaan, waxaanu u hogaansanay waajibaadka tallaalka ee magaalada iyo degmada Denver markii uu jiray Amarka Caafimaadka Dadweynaha (PHO). Hadda, ma jiraan PHO, HR-kana loogama baahna inay uruuriyaan macluumaadka tallaalka COVID ee ku saabsan tallaalkada xoojiyaha ah ee mustaqbalka ama xilliga shaqaaleysiinta cusub. Haddii PHO cusub la amro, waanu u hoggaansami doonnaa.</p>
---	--	---

<p>waxaa ku taliyey CDPHE taas oo la jaanqaadaysa waxa DPS ay xakamayn karto.</p>			
<p>2. Saamaynta COVID waa laga yareeyey goobta waxbarashada ardaydeena iyo goobta shaqada macallimiinta iyo shaqaalaha, annagoo si dhow ula shaqayno maamulka caafimaadka deegaanka iyo gobolka</p>	<p>Waxaan la soconaa Heerarka Talaalka Ardayda</p>	<p>La socodka heerarka talaalka ardayda bedelkii la kormeeri lahaa faafitaanka cudurka ayaa waxaa ku taliyey CDPHE taas oo la jaanqaadaysa waxa DPS ay xakamayn karto.</p>	<p>Inta lagu jirey waqtiyada dugsiyadu cuduro ka dillaaceen, waxaanu fulinay talooyinka DDPHE ee dheeraadka ah sida xirashada maaskarada iyo kordhinta socodsiinta hawada iyadoo dadaalku ahaa in dugsiyada sii furnaadaan. Baaritaan dheeraad ah kama dhicin dugsiyada, si kastaba ha ahaatee, mar haddii ay hoos u dhacday dillaaca Omicron-ka, waxaan helnay baaritaano badan oo COVID ah oo guriga lagu sameeyey kuwaas oo shaqaalaha guriga loogu dhiibey lana siinayay ardayda iyo qoysaskooda marka ay isku arkaan astaamaha.</p> <p>Agaasimaha Kalkaalinta Caafimaadka ee Degmadeena waxa uu sii wadaa kormeerida bulshada iyo dugsiyada ee heerka xaaladaha COVID waxa uuna kooxda cudurada faafa ee DDPHE la yeeshaa doodo todobaadle ah si uu ula socdo heerka faafitaanka COVID. Maadaama xeeladaha yaraynta lagula taliyey dugsiyada ku jira xaalad dillaaca cudurka ee laga warhelo, waxaanu sii wadi doonaa inaan u qoyskeena u gudbino talooyinkan, hadba sidii loogu baahdo, .</p>
<p>4. Kor u qaadista waxbarashada ardayga</p>	<p>Waxaan xaqiijinaa in gelitaanka waxbarashada qof ahaaneed ay ahaato mudnaan hadba marka ay xaaladaheenna caafimaad ee markaas jira noo oggolaadaan</p>	<p>Cilmi-baaris ay samaysay Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta ayaa muujisay in waxbarashada shakhsi ahaan looga xaadiro ay tahay habka ugu wixtarka badan ee lagu dhimi karo qaar badan oo ka</p>	<p>Inta lagu jirey sannad dugsiyeedkii 21/22 kooxda dugsiyada, oo ay iskaashanayaan kooxdayada takhasuska u leh hawl-fulinta waxay abuureen habraac ay dugsiyadu ku codsadaan u guuritaanka ku meelgaarka ah ee waxbarashada khadka ah.</p> <p>Nidaamkani waxa uu abuuray dhawr lakab oo kala-shaandhayn ah iyadoo codsiyada ugu dambayntii ay ku soo biyo shubteen miiska Kormeeraha Guud si uu u bixiyo ansixinta kama dambaysta ah.</p>

		<p>mid ah caqabadaha caafimaadka maskaxda ee la xiriira masiibada/cudurka a safmareenka ah ee COVID-19.</p> <p><a href="https://www.aap.org/en/pages/2019-novel-coronaviruses-covid-19-infections/clinic-al-guidance/covid-19-planning-considerations-return-to-in-person-education-in-schools/">https://www.aap.org/en/pages/2019-novel-coronaviruses-covid-19-infections/clinic-al-guidance/covid-19-planning-considerations-return-to-in-person-education-in-schools/</a></p>	<p>Kahor inta aan iskuulada loo ogolaanin in ay si toos ah ugu wareegaan waxbarashada khadka ah, iskuulada waxaa looga baahnaa in ay muujiyaan in talaabo kasta oo suurtagal ah la qaaday si loo xaqiijiyo in waxbarashada qof ahaan looga xaadiro la sii wadi karo.</p>
<p>5. Kordhinta waxbarashada shakhsi ahaan looga soo xaadiro ee ardayda</p>	<p>Waxaanu ka faa'iidayanaa taageerooyinka kale sida agabyada si dugsiyada ay u sii furnaadaan. (Shaqaalaha Xafiiska Dhexe ee dugsiyada, Hawlgalayaasha Ganacsiga iyo Bulshada oo loo isticmaalo agab ahaan, iwm.)</p>	<p>Dhamaan kheyraadka shaqaalaha ayaa la taaban doonaa si loo xaqiijiyo in dugsiyadu furnaadaan haddii dhibaato caafimaad dhacdo</p>	<p>Dhowr jeer inta lagu jirey sannad dugsiyeedkii 2021-22, kor u kaca COVID ayaa abuuray cillado waaweyn xagga shaqaalaha ah. Si loo joogteeyo waxbarashada qof ahaan looga xaadiro, Dr. Marrero wuxuu HR iyo kooxda dugsiyada kala shaqeeyay sidii loo abuuri lahaa liiska shaqaalaha xafiiska dhexe ee u qalma inay si joogto ah u buuxiyaan doorarka dugsiyada.</p> <p>Dedaalkani wuxuu ku lahaa 640 oo ka mid ah 1190-ka shaqaale ee ka diiwaangashan xafiiska dhexe wuxuuna sii socday ilaa dhamaadkii dugsiyada iyadoo dadaalka laga waday dhawr dugsi oo naga mid ah, wuxuuna dadaalkaas noo ogolaaday in aanu sii wadno waxbarashada qof ahaan looga soo xaadiro. Dadaalkan waxa la sameeyay iyadoo loo marayo hawlo joogto ah oo u ogolaaday dugsiyadu inay ilaashadaan heerka joogtaynta iyo sii jiritaanka taageerada inta lagu jirey qaybaha ugu adag ee kor u kicitaanka cudurka. Dugsiyada waxaa loo aqoonsaday inay yihiin kuwo baahidooda sareeyso iyadoo lagu salaynayo heerka maqnaanshaha iyo</p>

		<p>tirada dadka loo adeegayo. Wadar ahaan 43 dugsi oo baahidooda sareeysa ayaa la aqoonsaday waxaana afar (4) shaqaale ah oo ka tirsan Xafiiska Dhexe la geeyay Isniintii, Khamiistii iyo Jimcahii maalin kasta si ay wax uga qabtaan baahida. Shaqaalaha Xafiiska Dhexe ee haysta shatiga waxbarida ayaa mudnaanta la siiyey si loo geeyo dugsiyada baahidooda sareyso.</p> <p>HR waxay ka shaqeyeen inay kordhiyaan qiimaha shaqada saacadlaha ah waxayna magdhow siinayeen macallimiinta shatiyada haysta ee bedelka ku yimaada si ay nooga caawiso soo jiidashada iyo haysashada macalliinta beddelka ah. Intaa waxaa dheer, waxaan bixinay dhiirigelin lacageed iyadoo lagu salaynaayay tirada shaqada ee la aqbalay bishiiba. Tani waxay naga caawisay inaan kordhino awoodayada aan ku dabooleyno maqnaanshaha fasalka.</p>
--	--	--

TP 1.4.3 Hakinada Ka Baxsan Dugsiga (OSS) ee boqolkii ardayda ayaa dib-u-loogu hagaajiyey gundhiga, oo aan ka sarreyn mida 2018-19	1.4.3a) Guud ahaan 4.25 ama ka yar 4.25	4.14
	1.4.3b) Laatiinka 4.04 ama ka yar 4.04	4.21
	1.4.3c) MLL 3.98 ama ka yar 3.98	3.75
	1.4.3d) Ardayda Naafada ah 10.81 ama ka yar 10.81	10.30
	1.4.3e) Ardayda Madowga ah 10.15 ama ka yar 10.15	9.16
	1.4.3f) Dumarka madowga ah 8.08 ama ka yar 8.08	8.15
	1.4.3g) Ragga madowga ah 13.27 ama ka yar 13.27	10.16

TP1.4.5  
Celceliska Wakhtiyada Jawaab Celinta Badbaadada DPS (Luulyo '21-Juun  
TP1.4.3a) Mudnaanta 1 5 daq. 7 daq 4 daq TP1.4.3b)  
Mudnaanta 2 12 daq. 15 daq. 12 daq TP1.4.3c) Mudnaanta

'22

3 12 daq. 15 daq 12 daqiiqo

## Guudmar

Kooxda Hoggaanka Sare waxay gundhiga Hakinka Ka Baxsan Dugsiga (OSS) ka dhigeen boqolkii arday. Jadwalka sare wuxuu muujinayaa yoolka guud ee lala kulmay iyo yoolalka loo dejiyay qayb kasta, marka laga reebo yoolalka ardayda Latinx-ka ah iyo ardayda dumarka madowga ah oo lagu arkay koror 4.2% iyo .9% iyagoo ka soo korodhay 4.04 ilaa 4.21 iyo 8.08 ilaa 8.15 oo ka iskuul ka eryida dugsiga ee boqolkii arday, isugu aadan siday u kala horreeyaan. Degmadu waxay sii sahamin doontaa sababaha asalka u ah kororkan oo waxay bilaabi doontaa inay dejiso istaraatiijiyad lagu yareynayo wixii koror dheeraad ah ee ka imaan kara ardayda dumarka Latinx-ka iyo Madowga ah iyadoo la sii wadi doono buuxinta yoolalka loo dejiyay qaybaha kale. Qodob dheeraad ah oo dabaaldeg mudan ayaa ah hoos u dhaca guud ee OSS ee Ardayda Madowga ah oo guud ahaan ah 9.75%. Waxaan qayb ahaan guushan u nisbeeynaya in aan diiradda saaray qorshooyinka Waxqabadka Sareeya ee Ardayda Madowga ah.

Kooxda Badbaadada iyo Nabadgelyada DPS waxay ku guulaysteen inay dejiyaan gundhiga waqtiyada jawaabta celinta iyo bartilmaameedyada Mudnaanta dhacdooyinka 1, 2 iyo 3. Sanad dugsiyeedkii 2022/23 kooxdu waxay ku guulaysatay inay la kulmaan/buuxiyaan cabbirka/halbeegga bartilmaameedka ee wakhtiga jawaab-celinta dhexdhexaadka ah ee ka yar 7 daqiiqo marka loo eego dhacdooyinka ku jira Mudnaanta 1 iyo in ka yar 15 daqiiqo ee dhacdooyinka ku jira Mudnaanta 2 iyo 3.

**Guud ahaan, dhammaan bartilmaameedyadii waa la buuxiyey/lala kulmay marka laga reebo qaybaha dumarka ee Latinx-ka iyo Madowga ah dhanka Hakinka/Dugsi ka Eryida Ka Baxsan Dugsiga ee 100 ardayba. Sidaa darteed, 8/10 oo yoolalka ah ayaa lagu guuleystay/la gaary muddadan qiimaynta.**

## RI.5 - Qalinjabinta Kadib iyo Jinsiyadda Caalamiga ah

### U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doonaa 21/22 marka:

1. Degmadu ay dib u dhiso gundhiga heerka qalinjebinta ee 4-sano, 5-sano, 6-sano, iyo 7-sano ah sababo la xiriira cudurka safmareenka ah. Xogta heerka qalin-jabinta waxaa xisaabiya CDE. Tani waa mid caqli-gal ah maadaama saameynta cudurkii safmareenka ahaa uu ku yeeshay heerarka qalin-jabinta iyo heerarka ka-tagista ardayda dugsiyada sare aan wali ka muuqan isbeddellada xogta qaranka.
2. Ardayda fasalka 12aad ee ifbaxaya u deji gundhigga Ku Socda Wadada Qalanjebinta. Tan waa la sababeeyay maadaama shuruudaha gobolka Colorado ee qalin-jabinta ay yihiin in ardaydu muujiyaan karti si ay u qalin-jabiyaan.
3. Dib-u-deji gundhiga ardayda ka qalin-jabinaysa (Seal of Biliteracy) kadib carqaladayntii ka dhalatay masiibadii ama cudurkii safmareenka ahaa.
4. Dhammaan dugsiyada sare ee ay degmadu maamusho oo bixiya koorsooyinka akhris-qoraalka maaliyadda. Tani waa sababeeyey maadaama degmadu ay dhisayso 100% dugsiyada marka la gaaro sannad dugsiyeedka 22/23.

	Degmadu Maamusho (Aan Khusayn)	dib-u-hagaajinta gundhigga 2022	
TP1.5.7 # ee ardayda ku qalin jabinaysa (Seal of Biliteracy) (qiyaas hoosaadka suurtagalka ah - % ee luqadaha aan Isbaanishka ahayn) (miisaanka=1)			<b><u>Ka warbixinta cabbirkan waxa loo raray bisha Agoosto codsiga xubinta SLT sabab la xiriirta helitaan la'aanta xogta ku saabsan qalin-jabiyeyaasha (Seal of Biliteracy).</u></b>
			Fasalka 2021
	1.5.1a) Dhammaan Ardayda		74.0%
TP1.5.1a Deji jaangooyooyinka loogu talagalay heerarka qalin-jabinta ee xilligii cudurka safmareenka	1.2.1b) Ardayda Madowga ah (4-sano) 1.2.1c) Ardayda Latinx-ka ah (4-sano) 1.2.1d) Ku jira barnaamijka MLL-yada (4 Sano) 1.2.1e) Ardayda Naafada ah (4 Sano) 1.2.1f) Heerka Qalinjabinta 5-sano 1.2.1g) Heerka Qalinjabinta 6-sano 1.2.1h) Heerka Qalinjabinta 7-sano	Aan Khusayn Dejinta gundhigga sanadka 2022	71.7% 69.5% 52.7% 55.1% 80.3% 79.4% 79.4%

## Guudmar

Iyadoo heerarka qalin-jabinta ee ardayda Madowga iyo Latinx-ka ah ay dhaafeen heerarkii 2018-19, waxaa jira hoos u dhac ku yimid tirada ardayda MLL iyo SWD. Arrintaan waxaa loo aaneyn karaa dhowr arrimood oo la jaanqaadaya yaraanshaha tirada shaqaalaha taas oo ka dhalatay cudurkii safmareenka ahaa, gaar ahaan SPED. In macalimiinta SPED laga waayay dalka oo dhan ayaa sii xumeysay nusqaamaha ka dhashay waxbarashada ardayda iyo guud ahaan u hoggaansanaanta SPED marka laga hadlayo IEP-yada, iyo sidoo kale waxqabadyaad loogu talagalay in lagu wanaajiyo in ardaydu helaan waxbarasho tayo sare leh iyadoo wixii qabanqabooyin ah si buuxda loo hirgeliyey oo ay fahmeen macalimiinta asaasiga ah iyo macalimiinta SPED. Waxay sidoo kale ka hadlaysaa kiisaska oo u korodhay macalimiinta sababo la xiriira yeraansho ka jira xagga xirfadlayaasha SPED oo dalka oo dhan ah.

Degmadu waxay si firfircoon uga shaqaynaysaa inay shaqaalaysiiso, u sii hayso oo ayna dib u tababarto dhammaan macalimiinta SPED si ay ula jaanqaadaan waxa ardaydeenu u baahan yihiin inta loo guurayo waxbarashada fasalka ee kadib cudurka safmareenka ah. Degmadu waxay diiradda saari doontaa tababarka iyo hababka isla xisaabtanka ee xaqiijinaya in IEP-yada si sax ah loo qoro loona fuliyo, iyo sidoo kale habdhaqanada ugu fiican ee hirgelinta joogtada ah ee qabanqabooyinka lagu taageerayo helitaanka nuxurka heerka fasalka.

Ka sokow SPED, degmadu waxay aragtay hoos u dhac ku yimid xogta ardayda MLE taasoo soo jeedinaysa in qaabka waxbarashada ee isku-dhafka ah uusan ahayn qaabka ugu waxtarka badan ee wax lagu baro ardayda. Degmadu waxay hadda ka shaqaynaysaa sidii ay u hirgelin lahayd wareeg wax-barid iyo waxbarasho ah oo taageeraya Baritaanka Luuqadda ee Cad (ELI) ee loogu talagalay dhammaan ardayda, kaas oo bartilmaameedsan doona baahiyaha MLE isla markaana ka taageeri doona inay helaan nuxurka waxbarasho oo ku qoran afkooda hooyo, iyo sidoo kale ka taageeraya inay galaan waxbarasho fasaleed oo fiican. Iyadoo ka mid ah shaqada Ogow Cadaaladda (Know Justice), Ogow Qaraarka Nabadda (Know Peace Resolution), sidoo kale waa lama huraan in la baaro manhajka si loo xaqiijiyo in ardaydu helayaan agabyo Ku Habboon Dhaqanka Iyo Luqado Kala Duwana Ah oo aad u soo jiidanaya. Shaqadaasi way socotaa waxayna saamayn sare ku yeelan doontaa heerarka qalin-jabinta ee ardaydu wixii hadda ka dambeeya.

**Guud ahaan, Degmadu waxay dejisay gundhigga dhammaan kooxaha lagu tilmaamay shaxda kore.** Gundhigga wuxuu u oggolaanayaa Degmadu inay dejiso yoolal macquul ah oo loogu talagalay heerarka qalin-jabinta mustaqbalka.

TP1.5.2 Ardayda fasalka 12aad ee ifbaxaya u deji gundhigga Ku Socda Wadada	1.5.2a) Dhammaan Ardayda	Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022	<b>Kartida</b>
	1.5.2b) Ardayda Madowga ah		54%
	1.5.2c) Ardayda Latinx-ka ah		41%
	Aan Khuseyn		44%
			14%
			<b>Buundooyinka/dhibcaha/kiridhit yada</b>
			65%
			60%

Qalanjebinta (OTG) (AYG 2023)	1.5.2d) Ku jira barnaamijka MLL-yada	58%	17%
	1.5.2e) Ardayda Naafada ah	38%	
		44%	
TP1.5.7 # ee ardayda ku qalin jebinaysa shahaadada (Seal of Biliteracy)	Dhamaan Ardayda (Seal of Biliteracy) (qiyaas hoosaadka suurtagalka ah - % ee luqadaha aan Isbaanishka ahayn)	Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022 845 arday (laga xaqiijiyay 45 dugsi, luuqado) (798 arday ayaa dhiman oo la sugayaa)	
TP1.5.8 Helitaanka koorsooyinka aqoonta dhaqaalaha ee ardayda dugsiga sare	Degmadu maamusho 100% Aan Khuseyn	<p><i>*Tani lama heli karo ilaa laga helo dhammaan buundooyinka qiimaynta*</i></p> <p><i>3 ka mid ah 23-da ma haystaan midna, 20 ka mid ah 23-ka dugsi dhaqameed ee degmadu waxay leeyihiin ugu yaraan 1 qayb oo ka mid ah 1 ka mid ah koorsooyinka loo qorsheeyay 22-23, koorsooyinka hoos ku qoran ee hadda ku jira. Intaa waxaa dheer, 9 ka mid ah 13 dugsi sare ee hal-abuurka ee degmadu maamusho waxay leeyihiin ugu yaraan 1 qayb oo ka mid ah 1 ka mid ah koorsooyinka Degmadu 100% maamusho ee loo qorsheeyay 22-23</i></p>	

## Guudmar

Kooxda Sare iyo anigu waxaanu samaynay gundhig cusub oo loogu talagalay Ku Socda Wadada Qalinjebinta (OTG) ee ardayda dugsiga sare.

Wixii hadda ka dambeeya, sida kormeerka horumarka, waxaan la socon doonaa heerarka OTG-ga ee Sanadka Qalinjabinta Ardayda Ee La Filayo (AYG) marka la gaaro sannad dugsiyeedka soo socda. Laga bilaabo Juun 2022, 65% ee ardayda (ee dhammaan qoysaska dugsiyada) kuwaas oo ah Saadaalintooda Sanadka Qalanjebinta yahay 2023 ayaa ku socda wadadii Buundooyinka, 54% waxay ku socdaan wadadii Kartida.

Laga bilaabo Agoosto 2022, 845 arday oo dhigata dugsiga sare ayaa ku qalin jabiyay (Seal of Biliteracy). Tiradani waxay ka dhigan tahay 29 luqadood, oo 95 ka mid ah ardaydu waxay Shahaadada (Seal) ka heleen in ka badan laba luqadood. Ku dhawaad saddex-meelood labo ka mid ah ardayda helaya shahaadada (Seal of Biliteracy) sannad kasta waa ardayda luqado badan ku hadla. Tani waxay marag madoon u tahay sida ay u xoogan yihiin barnaamijyadeena luuqadeed ee Degmada, waxaana laga yaabaa in degmadu ay qaranka ku hogaaminaysa tirakoobkan!

Kani waa sannadkii toddobaad oo DPS ay ardaydeena siiso shahaadada (Seal of Biliteracy). Sannadkii ugu horreeyay ee fasalka 2016, Degmadu waxay aad ugu faraxsanayd inay soo bandhigto 195 arday oo helay



shahaadada (Seal of Biliteracy). Tiradaas ayaa kor u kacday sanad walba wixii markaas ka dambeeyay, waxaana sanadkan ay degmadu filaysaa in ay gaarto 1,000.

798 kale oo arday dheeraad ah ayaa ku sii jira heerka sugitaanka ilaa Sebtembar 2022. Marka xaqiijintan kama dambaysta ah la sameeyo, qoraalka (script-ga) ardayga ayaa la cusboonaysiiyaa iyadoo la aqoonsanayo inuu helay abaalmarintan. Waxaan sidoo kale awood u yeelan doonaa inaan xisaabino boqolleyda ardayda dugsiga sare ee helay shahaadada (Seal of Biliteracy) iyo boqolleyda ardayda heshay shahaadada (Seal of Biliteracy) iyadoo ku helay luqadaha aan Isbaanishka ahayn. Waxaan cusbooneysiin doonaa gundigga Sebtembar 2022, sanadaha soo socdana waxaan la socon doonaa cabbirkan billaha Sebtembar halkii laga samayn lahaa Agoosto.

Inta badan dugsiyada sare ee DPS, 30/36, waxay leeyihiin koorsooyin aqoon dhaqaale ah oo loo qorsheeyay ardayda. 30-kan dugsi waxay hadda leeyihiin 9 koorso oo dhaqaale oo kala duwan oo loo qorsheeyay ardayda, 6 ka mid ah oo ah taxane soconaya laba simistar. Lix dugsi ayaan jadwalkooda 22-23 ugu jirin mid ka mid ah koorsooyinka hadda la aqoonsaday.

Waxa jira shan dugsi oo tijaabinaya koorsoada Aqoonta Maaliyadeed ee waafaqsan hab-raacyada Siyaasadda Maamulka IKF-R1. Marka tijaabada la dhammeeyo, degmadu waxay u baahan doontaa dhammaan ardayda inay dhammeeyaan koorsoada aqoonta dhaqaalaha si ay shahaadada dhibloomada uga helaan DPS (Fasalka Bilowga ah ee 2023-24). Iyadoo Algebrada Maaliyadeed ay sidoo kale buuxin doonto shuruudaha qalin-jabinta, waxay u baahan doontaa in dib-u-eegis lagu sameeyo waxyaabaha ay koorsoada ka kooban tahay si loo buuxiyo/loola kulmo dhammaan tilmaamaha lagama maarmaanka ah ee lagu qeexay siyaasadda Guddiga.

**Guud ahaan, dhammaan bartilmaameedyada waa la fuliyay oo sharraxaad ka bixinta 20 dugsi ee ka midka ah 23 ayaa hagaagsan.** Helitaanka koorsooyinka aqoonta dhaqaale ee loogu talagalay ardayda dugsiga sare waxay u muuqataa inay hadda gaarayso 86.9% marka laga hadlayo dugsiyada ay degmadu maamusho. Dugsiyada aan hadda lahayn koorsoada aqoonta maaliyadeed ee la soo diyaariyey waa Dugsiga Compassion Road, Florence Crittenden iyo Xarunta Barashada Xirfadaha Shaqo (Career Education Center) (CEC). Dugsiga Compassion Road, Florence Crittenden iyo CEC dhamaantood waxay Aqoonta Maaliyadeed u bixiyaan koorso la doorto ahaan iyada oo loo marayo manhajka Edgenuity halkii laga dhigi lahaa shuruud aasaasi ah. Haddii ardaydu aanay xulasho ahaan u dooran koorsoada Aqoonta Maaliyadeed, koorsoadu kama muuqanayso liiska. **Sidaa darteed, 100% dugsiyadeena sare waxay bixiyaan koorsooyinka aqoonta maaliyadeed.**

## 1.1 Siyaasadda Bayaanka Filashooyinka

DPS waxay noqon doontaa degmo xor ka ah nidaamka dulmiga iyo qaabdhismeedyada ku qotoma cunsuriyadda iyo inay noqoto meel ardayda iyo xubnaha kooxda ku aadiya sinnaanta jinsiyadda iyo waxbarashada, ardayda awood u siinaya inay ugu dambeyntii noqdaan muwaadiniin caalami ah oo damiir/naxriis leh iyo hogaamiyayaal iskaashanaya.

Sinnaanta jinsiyadda iyo waxbarashada waa mas'uuliyaddeena wadajirka ah. Waxaan gaari doonaa sinaan markaan burburino nidaamyada sida dheer ugu qotoma dulmiga kuwaas oo taariikh ahaan sababay sinaan la'aan iyo u sinnaan la'aanta qaybinta fursadaha iyo agabyada loogu talagalay aqoonsiyada la takooro, oo ay ku jiraan jinsi, isir, aqoonsiga jinsiga, nooca galmada, luqadda iyo kartida.

## Tafsiirka Macquulka Ah

DPS waxay Sinnaanta ka dhigtay laf-dhabarkeeda. Sabab la xiriirta taariikhda hodanka ku ah xuquuqda madaniga ah iyo firfircoonida ardayda ee DPS, oo ay ku jirto Burburkii Dugsiga Sare ee Galbeedka 1969, iyo taariikhda Colorado ee soo dhaweynta mid ka mid ah kooxaha nacaybka ee ugu caansanaa, in Sinnaanta loo doorto aasaas ahaan waxay u muuqatay mid lama huraan ah. Dhegeysiga codadka xubnahayaga ayaa muhiim u ah fahamka arrimaha adag iyo caqabadaha ku qotoma takoorka. Shirweynaha Barayaasha Isbaanishka ayaa kala shaqeyay mas'uuliyiinta degmada in la abuurto Wareegto Oggolaansho oo La Bedelay taas oo khasab ka dhigeysa in loo hogaansamo wax ka qabashada dhaqamada takoorka ah ee ka dhanka ah ardayda Luuqadaha badan ku hadla.

24-kii bilood ee la soo dhaafay, waxaan la kulannay dhibaatooyinka la xiriira cudurka safmareenka ahaa waxaan aragnay saameynta dulqaad la'aanta ku aadan dadka kale ee ka soo jeeda jinsiyadaha kale, diinaha, jinsiga iyo nooca galmoodka, awoodda jagada iyo xiriirka siyaasadeed. Waxaan sidoo kale aragnay koror xagga hadalada ka dhanka ah soogalootiga iyo dulqaad la'aanta lagula kacayo dadka ka soo jeeda asal dhaqameedyo kala duwan. Erayadii Mahatma Gandhi, "Dulqaad la'aanta lafteedu waa nooc ka mid ah rabshadaha iyo caqabad ku aadan koritaanka ruuxa dimuqraadiyadda dhabta ah." Marka la eego taariikhda wanaagsan ee DPS iyo marka loo eego mas'uuliyaddayda hoggaaminta ururkan weyn, waxaan ballan qaadayaa:

1. Ogaanshaha, burburinta oo dib u eegis ku sameynta nidaamyada cadaadiska joogtada ah ee ka dhex jira dugsiyadeena;
2. Baritaanka shaqaalaha wax ku saabsan dulmiga iyo dhaqamada sinnaanta ee waxbarashada;
3. Horumarinta hay'addaha ardaydeenna awood siinaya si ay wax u bartaan oo ay si wax ku ool ah uga mid noqdaan isbeddelada la hirgeliyay, doodaha isla markaana ay u dhaqmaan si dan ugu jirta dhamaan bulshadeena caalamiga ah, ee ku hadasha luqadaha badan; (Tani waxay ku saabsan tahay in la aqbalo kala duwanaanshaha dhaqamada kale iyo aqbalaadda dhaqankooda.)
4. Xoojinta macalimiinteena iyo adeeg bixiyayaasha gaarka ah si ay ula xiriiraan bulshooyinka ay u adeegaan si ay si fiican u fahmaan oo ayna u aqbalaan kala duwanaanshahooda.
5. Si buuxda u hirgelinta dhammaan shuruudaha Wareegtada Oggolaanshaha iyo sii waditaanka baahiyaha MLL-yada udub dhexaad loogaga dhigo dhammaan dadaallada DPS.

## Natiijooyinka

Marka loo eego wakhtiga xaddidan ee Kormeeraha Guud u haysto dejinta iyo hirgelinta Qorshe Istaraatiijiyad ah, qaar ka mid ah bartilmaameedyada iyo gundhigyada ayaa ka muuqan doona sannad dugsiyeedka 2021-22 laakiin qaar ka mid ah cabbirrada u hoggaansanaanta ma soo muuqan doonaan ilaa sannad dugsiyeedka 2022-23.

U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doona 2021/22 marka:

1. Ugu yaraan laba sistem loo aqoonsado in la baabi'iyo oo ay ka mid tahay dib u habeynta Xafiiska Dhexe waxaana burburin lahaa dhowr kooxood oo kala duwan iyo xubno badan oo DPS ka tirsan. Ay jirto heer cabbiraad oo macquul ah iyo heerka guulgaaris maadaama burburinta nidaamyadan ay ku lug yeelan doonaan dhawr kooxood oo kala duwan oo ka tirsan ururka waxaana laga yaabaa in loo baahdo in nidaamyadan isla markiiba la beddelo haddii lagu xiro xeerarka iyo/ama siyaasadaha gobolka. Dib-u-habaynta Xafiiska Dhexe, shaqaalaha waxaa loogu talagalay inay meesha ka saaraan

kala qaybsanaanta iyo in ay bixiyaan agabka heer dugsi ah inta ay Degmada ka soo kabanayso saamaynta cudurkii safmareenka ahaa.

2. **Macallimiinta Midabka Leh iyo Macallimiinta Luuqadaha Badan waxa loo hayn doonaa si la mid ah macallimiinta kale ee DPS iyadoo lagu salaynayo xisaabinta haynta hordhaca ah ee ay sameeyaan Qeybta Maamulka Shaqada iyo Shaqaalaha marka la gaaro Sebtembar 2022. Kani waa cabbir iyo bartilmaameed macquul ah maadaama isbeddellada qaranka ay muujinayaan in macallimiintu ay shaqooyinka uga tagayaan heer naxdin leh.**

U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka Sanad Dugsiyeedka 22/23 iyo wixii ka dambeeya waxay u baahan doontaa tallaabooyin dheeraad ah oo ay ku jiraan:

3. % korodhka dareenka lahaanshaha ee ardayda isir ahaan iyo luqad ahaanba kala duwan sida lagu cabbiray sahanka Codkaaga/Tu Voz bishii Meey, sahankaas oo ay bixiyeen kooxda Cilmi-baarista & Qiimaynta.
4. % korodhka dareenka lahaanshaha ee ardayda isir ahaan iyo luuqad ahaanba kala duwan sida lagu cabbiray sahanka Codkaaga/Tu Voz bishii Meey, sahankaas oo ay bixiyeen kooxda Cilmi-baarista & Qiimaynta.

**Sababaynta:** Tani waa tarjumaad macquul ah oo loogu talagalay in si joogto ah loo burburiyo qaab-dhismeedka nidaamka. Waxay qaadatay qarniyo badan oo takoor iyo dulmi ah in la abuuro nidaamka hadda jira ee aynu ku shaqayno, dadkana ku hoggaamino. Waxay qaadan doontaa dadaal joogto ah oo ay sameeyaan dhammaan xubnaha shaqaalaha si ay u burburiyaan nidaamyadan iyo qaab-dhismeedyadan ku qotoman takoorka jinsiyadeed.

1.1.1 # ee nidaamyada loo aqoonsaday burburin ama dib u eegis	Qoyska Dugsiyada	2 nidaam ayaa la aqoonsaday <i>(miisaanka= 2 midkiiba)</i>	Imisa nidaam ayaa hadda jira? Eber ayaa la aqoonsaday	Meey	Tani waa ficilka ugu weyn ee lagu muujiyey Bayaanka Filashooyinka.
1.1.2 Sii-haynta (hordhaca ah) degmada ee Macallimiinta BIPOC iyo MLL ee heer la mid ah (ama ka sareeya) macallimiinta kale 1.1.4a	Degmadu Maamusho	Degmada Ay Maamusho <i>(miisaanka =0.5 midkiiba)</i>	Aan Khuseyn)	Sebteembar	Bedelitaanka dhaqanka iyo jawiga iyadoo la adeegsanayo shaqaale ka tarjumaya dadweynaha aan u adeegno

<p>Macalimiinta BIPOC 1.1.4b Macallimiinta ELA-S 1.1.4c Hogaamiyayaasha Dugsiyada BIPOC 1.1.4d BIPOC Guud ahaan</p>			
<p>1.1.3 % korodhka dareenka lahaanshaha ee ardayda jinsiyad ahaan iyo luqad ahaan kala duwan ee sahanka Codkaaga/Tu Voz "intee in le'eg ayaad dareentaa inaad ka tirsan tahay dugsiagaaga?" 1.1.2a Ardayda Madowga ah, 1.1.2b Latinx-ka ah, 1.1.2c MLL-ka ah,</p>	<p>Degmadu Maamusho</p>	<p>laga bilaabo Meey 2021-ku xaddid Dugsiyada Degmada Ay Maamusho 1.1.2a 68% 1.1.2b 69% 1.1.2c 73%</p>	<p>Juun</p> <p>Qayb muhiim ah oo ka mid ah ardayda oo dareema inay ku jiraan oo ay qeyb ka yihiin bulshada waa waayo-aragnimadooda dhaqanka waxbarashada iyo filashooyinka macallimiinta iyo ardayda kale. Si kastaba ha ahaatee, wakhtigan ma ogolaanayo in isbeddel lagu sameeyo nidaamyada ama khibradaha ardayda ama shaqaalaha. U gudub wareegga xiga.</p>
<p>1.1.4 % kor u kaca dareenka lahaanshaha ee qoysaska jinsiyadaha iyo luqadaha kala duwan ee sahanka Codkaaga/Tu Voz ee inta qoys ee sheegtay "Waxaan dareemayaa in la igu soo dhaweeyay dugsiaga ardaydayda"</p>	<p>Degmadu Maamusho</p>	<p>Laga bilaabo Dayrta 2021, oo ku kooban dugsiyada ay degmadu maamusho 1.1.3a  91.1% 1.1.3b 93.0% 1.1.3c Dejinta gundhigga sanadka 2022</p>	<p>Juun</p> <p>Tani waxay wax ka qabanaysaa ballanqaadyada Ka-qaybgalinta Qoysaska iyo Bulshada. Si kastaba ha ahaatee, wakhtigan ma ogolaanayo in isbeddel lagu sameeyo nidaamyada ama khibradaha. U gudub wareegga xiga.</p>

1.1.3a Ardayda Madowga ah, 1.1.3b Latinx-ka, 1.1.3c MLL			
---	--	--	--

### Caddeynta Natiijooyinka La Gaaray

**Yoolka:** Oggaanshaha iyo burburinta nidaamyada joogtada iyo soo jireenka ah ee ka dhex jira nidaamka dugsiyadeena, iyo in dib loo dhiso khibrado arday, qoys iyo xubin kooxeed oo loo siman yahay.

**Gaar ahaan, Macallimiinta Midabka Leh iyo Macallimiinta Luuqadaha Badan waxa loo hayn doonaa si la mid ah macallimiinta kale ee DPS iyadoo lagu salaynayo xisaabinta haynta hordhaca ah ee ay sameeyaan Qeybta Maamulka Shaqada iyo Shaqaalaha marka la gaaro Sebtembar 2022. Kani waa cabbir iyo bartilmaameed macquul ah maadaama isbeddellada qaranka ay muujinayaan in macallimiintu ay shaqooyinka uga tagayaan heer naxdin leh.**

Waxaan noqon doonaa qof guuleystay haddii aan la kulmo 75% tallaabooyinka kor ku xusan.

Xogta la cusboonaysiiyay Sebtembar 2022 waxay muujinaysaa:

TP1.1.2) Sii-haynta (hordhaca ah) degmada ee Macallimiinta BIPOC iyo MLL ee heer la mid ah (ama ka sareeya) macallimiinta kale	1.1.2a Macallimiinta BIPOC		87.0%	
	1.1.2b Macalinka ELA-S		91.0%	
	1.1.2c Hogaamiyayaasha Dugsiyada BIPOC	Aan Khuseyn	Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022	87.0%
	1.1.2d BIPOC Guud ahaan			84.5%
TP1.1.2) Sii haynta kumeelgaarka ah ee degmada ee	Dhammaan Macallimiinta		Dib-u-hagaajinta gundhigga 2022	85.7%
				87.7%

Macalimiinta, Hogaamiyayaasha Dugsiyada iyo Barayaasha	Dhammaan Hogaamiyayaasha Dugsiga	Aan Khu sey n	84.1%
	Dhammaan Barayaasha		

**Guud ahaan, dhammaan bartilmaameedyadii waa la fuliyay** marka laga reebo Hogaamiyayaasha Dugsiyada BIPOC. Hogaamiyayaasha Dugsiyada BIPOC waxay lahaayeen heerka haysashada macallimiinta ee 87% marka loo barbardhigo dhamaan Hogaamiyayaasha Dugsiyada oo ah 87.7%. In kasta oo ay hal calaamadda uun ka yar boqolkiiba, waxa ay dhaaftay 75% oo ah heerka lagu heshiiyay ee Fasiraadda Macquulka ah ee Bayaanka Filashooyinka 1.1. Sidoo kale, qaar badan oo ka mid ah hoggaamiyayaasha dugsiyada BIPOC waxay u wareegeen Xafiiska Dhexe si ay u qabtaan doorar cusub sidaas darteed waxaan laba jibaari doonaa dadaalkayaga ku aadan shaqaaleysiinta hoggaamiyayaal BIPOC oo dheeraad ah oo heer dugsi ah.

## 1.2 Siyaasadda Bayaanka Filashooyinka

Iyadoo ay ugu wacan tahay saamaynta cudurkii safmareenka ahaa ee caalamiga ahaa uu ku yeeshay waxbaridda iyo waxbarashada, waxaanu ku tala galnay dardargelinta waayo-aragnimada waxbarasho annagoo bixinayna waxbarasho dhaqan iyo luuqad ahaanba joogta ah. Tani waxay awood noo siinaysaa inaan dib-u-eegis ku samayno sidii aan waxbarasho loo siman yahay u siin lahayn dhammaan ardaydeena, halkii aan ku celin lahayn sinnaan la'aanta taariikhiga ah ee ka jirtay degmada. Ardaydu waxay noqon doonaan kuwo madaxbannaan oo xirfadahooda iyo aqoontooda u isticmaala si ay isbeddel uga sameeyaan bulshadeena caalamka.

Si taas loo gaaro, waxaan fileynaa:

1. In dhammaan ardaydu ay soo bandhigi doonaan waayo-aragnimo waxbarasho oo si wanaagsan ugu baahansan qeybaha waxbarasho oo ay ka mid yihiin fanka, akhris-qoraalka, xisaabinta iyo xirfadaha fekerka muhiimka ah ee heerka fasalkooda ama ka sarreeya, guud ahaan iyo koox-hoosaadyo ahaan labadaba. Ardeyda muujinaysa in waxbarashadoodu ka hooseeyso heerka fasalka waxay muujin doonaan kobac ka badan hal sano sannad dugsiyeed kasta.
2. Dhammaan ardaydu waxay u bayla noqon doonaan manhajyo dhaqan iyo luqad ahaanba habboon oo si sax ah uga tarjumaya wax ku biirinta iyo caqabadaha haysta dadka kale ee ku salaysan diinta, jinsiga, qowmiyadda, aqoonsiga jinsiga, nooca galmada, luqadda iyo kartida.
3. Dhammaan ardaydu waxay heli doonaan fursado ay ku muujiyaan rabitaankooda si ay u saameeyaan isbeddelka ka soo baxa waxbarashadooda.
4. Ardayda naafada ah waxay heli doonaan agabyada iyo taageerada lagama maarmaanka ah si ay meesha uga saaraan caqabadaha ka hortaagan guusha.
5. Dhammaan ardaydu waxay muujin doonaan aqoonta heerka fasalka xilliga imtixaanada gobolka iyo degmada. Ardayda muujinaysa aqoonta heerka fasalka ka hooseeya waxay muujin doonaan kobac tacliimeed oo la taaban karo sannad dugsiyeed kasta.

## Tafsiirka Macquulka Ah

Waxbarashada labadii sano ee la soo dhaafay ayaa carqalad ku timid caalamka oo dhan. Ardaydu waxay lumiyeen in la taaban karo oo waxbarashadooda iyo waxyaabaha ay baranayaan ah. Qaar baa qiyaasaya in ardayda BIPOC iyo MLL ay lumiyeen wax barasho la eg 12 bilood. Tani waa mid aan horay loo arag waxayna u baahan tahay in degmooyinka ay xiraan daldaloolada tacliimeed iyadoo wajahayaan hoos u dhaca uu sababay faafitaanka cudurkii safmareenka ahaa iyo tiro badan oo bulshada ah oo aan la tallaalin. Caqabada dheeraadka ah waxay ku lug leedahay in aan lahayn xogta qiimaynta gobolka oo la isku halayn karo si loo dejiyo yoolalka ku aadan guulaha. Si kastaba ha ahaatee, hadafkayaga koowaad waa inaan wax barano carruurta, taageerno qoysaska, oo aan isbedel ku keeno nololaha annagoo ardayda u diyaarinayna kulliyad ama xirfado shaqo, iyadoo intaas dhan lagu samaynayo jawi ammaan ah.

## Natiijooyinka

Marka loo eego wakhtiga xaddidan ee Kormeeraha Guud u haysto dejinta iyo hirgelinta Qorshe Istaraatiijiyadeed, qaar ka mid ah bartilmaameedyada iyo gundhigyada ayaa ka muuqan doona sannad dugsiyeedka 2021-22 laakiin qaar ka mid ah cabbirrada u hoggaansanaanta ma soo muuqan doonaan ilaa sannad dugsiyeedka 2022-23.

U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doonaa 2021/22 marka:

1.
  - a. Dib-u-samaynta gudhigyada Sanad Dugsiyeedka 2021-22 si aan u dejino yoolalka ka-qaybgalinta iyo guulaha si ay ardaydu si fiican uga shaqeeyaan heerka fasalkooda iyo wixii ka sareeya marka la gaaro Imtixaanada Gobolka Colorado, oo ay ku jiraan CMAS, CSLA, READ Act iyo COSAT. Kani waa bartilmaameed macquul ah maadaama uu dib u soo celinayo awooddayada ah inaan dejino yoolal macno leh oo la cabbiri karo oo ku aadan guusha ardayga.
  - b. Ku billow qorshaha kormeerida waxqabadka ardayda ee sanadka oo dhan ee qiimaynaha la jaanqaadaya heerarka gobolka si loo muujiyo in ardaydu ay ku socdaan wadadii ay ku gaari lahaayeen yoolalka heerka fasalka ee xagga xisaabta iyo akhris-qoraalka iyo in kale. Kani waa heer macquul ah oo lagu gaaro guul maadaama aan luminay awooddii aan ku saadaalin lahayn waxqabadka ardayga sababo la xiriira saameyntii COVID-19.
  - c. Waayo-aragnimo waxbarasho oo si fiican u dhisan in loo sameeyo ardayda.
2. Xaqiijinta in dhammaan MLL-yadu ay helaan Barashada luqadda-hooyo oo tayo-sare leh, Horumarinta Luuqadda Nuxurka iyo Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee Isku-dhafan sida lagu muujiyey dib-u-eegista barnaamijka ELA. Kani waa cabbir macquul ah maadaama ay tahay habka ugu hufan ee lagu cabbiro u hoggaansanaanta Wareegtada Oggolaanshaha Wax Laga Badalay.

U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka Sanad Dugsiyeedka 2022/23 iyo wixii ka dambeeya waxay u baahan doontaa tallaabooyin dheeraad ah oo ay ku jiraan:

1. Yareynta tirada ardayda wax ku baranaysa heer ka hooseeya heerka fasalka K-3 sida lagu cabbiray xogta READ ACT.
2. U fiirsashada in 70% ardayda dhigata dugsiyada ay degmadu maamusho ay ka sheegi doonaan inay ku raaxaysanayaan manhajyada dhaqan iyo luqad ahaanba khuseeya iyada oo loo marayo Sahanka Codkaaga. Kani waa heer cabbireed oo macquul ah iyo heerka guuleed maadaama uu diiradda saarayo waayo-aragnimada ardayga halkii diiradda laga saari lahaa qorshayaasha macallinka, wuxuuna u baahan yahay isticmaalka ra'yi ururin/sahan si loo helo jawaabaha ardayda. Bartilmaameedka 70% ah waa macquul sababtoo ah kani waa cabbir cusub oo lala soconayo.

3. U fiirsashada in 50% ardayda dhigata dugsiyada ay degmadu maamusho ay ka sheegi doonaan inay leeyihiin rabitaan ardaynimo iyada oo loo marayo Sahanka Codkaaga. Tani waxay abuuraysaa Tasmada Rabitaanka Ardaynimada taas oo qabanyasa rabitaanka ardaynimada iyadoo lagu salaynayo shan su'aalood oo muhiim ah oo ku saabsan waxbarashadooda. Heerkan cabbireed waa mid macquul ah sababtoo ah wuxuu diiradda saarayaa waayo-aragnimada/waxay ardaydu la kulmaan. Bartilmaameedka 50% ayaa la dejiyay iyadoo lagu saleynayo xaqiiqda ah in tani ay tahay tallaabo cusub oo la soo bandhigay markii ugu horeysay.
4. U fiirsashada in X% ee Ardayda Naafada ah ay helaan taageerada lagama maarmaanka ah, sida lagu muujiyay u hoggaansanaanta heerarka CDE. Sababo la xiriira cudurkii safmareenka, degmadeenu waxay la kulantay yeraansho xagga shaqaalaha ah taas oo ka hor istaagtay Ardaydeena Naafada ah in ay helaan adeeg buuxa. Heerkan cabbirka iyo bartilmaameedka waa kuwo macquul ah maadaama.
5. U fiirsashada ardayda ka hooseeya heerka fasalka oo ku kordhaya 65% boqolkiiba ama wax ka sareeya. Sababtaynta Bedelka in Ka Badan kobaca sanadeedka waa sida soo socota: Imtixaanada CMAS iyo P/SAT looguma talagelin in lagu muujiyo kobaca ka badan wax u dhigma sanad. Dhanka Colorado, kobaca laguma muujiyo helitaanka ama waayida dhibcaha imtixaanka guulaha, laakiin *waxaa lagu muujiyey boqolleyda kobaca ardayga*. Iyadoo la isticmaalayo Moodhelka Kobaca Colorado, ardayda leh taariikh guuleed isku mid ah ayaa la isu barbardhigaa midba midka kale, taas oo naga caawisa inaan fahanno in kobacooda uu yahay mid sarreeyo, mid caadi ah, ama mid hooseeya. Marka loo eego Waaxda Waxbarashada ee Colorado (CDE), hadda ma jiro hal "sharci" oo lagu go'aaminayo waxa la dhihi karo inay yihiin kobac hooseeya, caadi ah, ama sareeya marka loo eego boqolley ahaan, waxaana muhiim ah in la aqoonsado in kobaca "sareeya" laga yaabo inuusan noqon mid ku filan inuu ka dhigo ardayda kuwo aqoon heer sare ah leh. Sida uu qeexay xeerka Guddiga Waxbarashada Gobolka Colorado, boqolleyda kobaca ardayda ee ilmo keli ah oo ku dhaca in u dhaxaysa xadka kobaca 35aad-65aad waxay ka tarjumaysaa Kobaca Caadiga ah, iyo in boqolleyda kobaca ardayda ee ilmo keli ah oo ka sarreeya boqolkiiba 65aad ay ka tarjumayso Kobac Sareeya.

<p>1.2.1a Gundhigga % Aqoonta Xisaabta: CMAS Fasalka 3-8 guud ahaan          1.2.1b Ardayda Madowga ah,          1.2.1c Latinx-ka,          1.2.1d MLL          1.2.1e SwD  <i>(miisaanka=0.5 midkiiba)</i></p>	<p>Qoyska Dugsiyada      Aan Khuseyn</p>	<p>Aasaaska gundhigga bisha Agoosto 2022</p>	<p>% Aqoonta Xisaabta ee Fasalada 3-8 CMAS waxay ina siinaysaa tilmaanta u diyaargarowga ardayda ee OTG iyo aqoonta heerka fasalka.</p>
<p>1.2.1f Gundhigga % Cabirka Xisaabta ee buundooyinka COSAT 9-11 Guud ahaan          1.2.1g Ardayda Madowga ah,          1.2.1 h Latinx-ka ah          1.2.1i MLL          1.2.1j SwD  <i>(miisaanka=0.5 midkiiba)</i></p>	<p>Qoyska Dugsiyada      Aan Khuseyn</p>	<p>Aasaaska gundhigga bisha Agoosto 2022</p>	<p>% ee Cabbirka Xisaabta ee Fasalada 9-11 ee COSAT waxay ina siinaysaa tilmaanta u diyaargarowga ardayda ee OTG iyo aqoonta heerka fasalka</p>



<p>1.2.1k Gundhigga % Aqoonta Akhris-qoraalka: CMAS Fasalka 3-8 guud ahaan 1.2.1l Ardayda Madowga ah, 1.2.1m Latinx-ka, 1.2.1n MLL 1.2.1o SwD (miisaanka=0.5 midkiiba)</p>	<p>Qoyska Dugsiyada</p>	<p>Aan Khuseyn</p>	<p>Aasaaska gundhigga bisha Agoosto 2022</p>	<p>% Aqoonta Xisaabta ee Fasalada 3-8 CMAS waxay ina siinaysaa tilmaanta u diyaargarowga ardayda ee OTG iyo aqoonta heerka fasalka ah.</p>
<p>1.2.5p Gundhigga %Cabbirka: COSAT EBRW Fasalada 9-11 1.2.1q Ardayda Madowga ah, 1.2.1r Latinx-ka, 1.2.1s MLL 1.2.1t SwD (miisaanka=0.5 midkiiba)</p>	<p>Qoyska Dugsiyada</p>	<p>Aan Khuseyn</p>	<p>Aasaaska gundhigga bisha Agoosto 2022</p>	<p>% Aqoonta Xisaabta ee Fasalada 3-8 CMAS waxay ina siinaysaa tilmaanta u diyaargarowga ardayda ee OTG iyo aqoonta heerka fasalka ah.</p>
<p>1.2.1u Deji qorshe loogu talagalay nidaamka imtixaanka oo la jaan qaadaya heerarka gobolka (miisaanka=2)</p>	<p>Degmadu Maamusho</p>	<p>Aan Khuseyn Aan Khuseyn</p>	<p>Sebteembar</p>	
<p>1.2.1v Sameey qeexitaanka iyo cabbirka waxbarashada si fiican u dhisan (miisaan=2)</p>		<p>Aan Khuseyn Aan Khuseyn</p>	<p>Sebteembar</p>	<p>Cilmi-baaristu waxay muujisay in ka-qaybgalinta ardaydu ay si aad ah u kororto marka casharrada la siiyo ay ka mid yihiin muujinta asalkooda dhaqameed iyo jinsiyadeed.</p>
<p>1.2.2 Boqolkiiba dugsiyada si ku meelgaar ah u maraya dib u eegista barnaamijka MLL (miisaanka=2)</p>	<p>Qoyska Dugsiyada 55%</p>	<p>Laga soo bilaabo 2019</p>	<p>Juun</p>	
<p>1.2.1k % Heerka Fasalka Akhris-qoraalka: Fasalada K-3 ee READ (laga yaabo inay ku daraan goolka SBGL?) guud</p>	<p>Qoyska Dugsiyada</p>	<p>Laga soo bilaabo 2019: 1.2.1k 68.2% 1.2.1l 58% 1.2.1m 64%</p>	<p>Juun</p>	

<p>ahaan 1.2.1l Madowga ah 1.2.1m Latinx-ka 1.2.1n MLL 1.2.1o SwD 1.2.2a Sahanka YourVoice/Codkaaga % MLL-yada ugu yaraan mararka qaarkood sheega in "Macallimiintaadu ma jecel yihiin inay ku hadlaan wax ka badan hal luqad xilliga fasalka?" Sahanka YourVoice/Codkaaga (MLLS kaliya)</p>	<p>Degmadu 1.2.1n 63% Maamusho 1.2.1o 31% 88%</p>	
<p>1.2.2b Sahanka YourVoice/Codkaaga celceliska tirada koox- hoosaadyada ardaydu waxay sheegaan inay wax ka bartaan (Dadka ka soo jeeda jinsiyadaha kala duwan, Haweenka, Dadka naafada a, Dumarka Khaniiska ah, khaniisiinta, Jinsi gaar ah aan lahayn, laba-jinsiyeed, iyo dadka ku hadla luqado kala duwan)</p>	<p><i>Laga bilaabo Sebtembar 2021:</i>  2.15</p>	<p>Juun</p>
<p>1.2.4 Adeeg ku filan oo ku habboon ardayda naafada ah sida lagu tilmaamay: 1.2.4a Tilmaamaha 11 dhamaystirka qiimaynta bilowga ah ee wakhtigii loogu talagalay 1.2.4b Tilmaamaha 12 ka gudbida wakhtigii loogu talagalay ee Qaybta C (ECE) u gudbida Qaybta B (kormeerka da'da dugsiga) 1.2.4c Tilmaamaha 2 - Dugsiga sare ka baxa</p>	<p>1.2.4a (sanadkii hore, hoos ayuu u socday inta lagu guda jirey covid) 84% 1.2.4b (celceliska saddexdii sano ee la soo dhaafay) 85% 1.2.4c (celceliska saddexdii sano ee la soo dhaafay) 29.5</p>	<p>Laga soo xigtay warbixinta CDE</p> <p>Febraayo</p>

**Yoolka:** U hoggaansanaanta Bayaanka Filashooyinka waxa la gaari doonaa 2021/22 marka:

1. Dib-u-hagaajinta Khadadka aasaasiga ah, Qiimaynta Toosan, waayo-aragnimada waxbarasho ee si wanaagsan loo soo koobay ee ardayda
  - a. Dib-u-samaynta gudhigada Sanad Dugsiyeedka 2021-22 si aan u dejino yoolalka ka-qaybgalinta iyo guulaha si ay ardaydu si fiican uga shaqeeyaan heerka fasalkooda iyo wixii ka sareeya marka la gaaro Imtixaanada Gobolka Colorado, oo ay ku jiraan CMAS, CSLA , READ Act iyo COSAT. Kani waa bartilmaameed macquul ah maadaama uu dib u soo celinayo awooddayada ah inaan dejino yoolal macno leh oo la cabbiri karo oo ku aadan guusha ardayga.
  - b. Bilaw qorshaha lagula soconayo waxqabadka ardayga inta lagu jiro sanadka oo dhan iyadoo la isticmaalayo imtixaano la jaanqaadaya heerarka gobolka si loo muujiyo in ardaydu ku socdaan wadadii ay ku gaari lahaayeen yoolalka heerka fasalka ee xagga xisaabta iyo akhris-qoraalka; Tani waa heer macquul ah oo guulgaaris ah maadaama Degmadu ay lumisay awooddii ay ku odorosi lahayd waxqabadka ardayda sababo la xiriira saamaynta COVID-19.
  - c. Waayo-aragnimo waxbarasho oo si fiican u dhisan in loo sameeyo ardayda.
2. Xaqiijinta in dhammaan MLL-yadu ay helaan Barashada luqadda-hooyo oo tayo-sare leh, Horumarinta Luuqadda Nuxurka iyo Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga ee Isku-dhafan sida lagu muujiyey dib-u-eegista barnaamijka ELA. Kani waa cabbir macquul ah maadaama ay tahay habka ugu hufan ee lagu cabbiro u hoggaansanaanta Wareegtada Oggolaanshaha Wax Laga Badalay.

Waxaan noqon doonaa qof guuleystay haddii aan la kulmo 75% tallaabooyinka kor ku xusan.

### Cabbirada Sebtembar

1.2.1z Deji qorshe loogu talagalay nidaamka imtixaanka oo la jaanqaadaya heerarka gobolka	Degmadu Maamusho	Aan Khusayn	Aan Khuseyn	<p>Mudnaanta #1: Dib u eegista iyo xoojinta hirgelinta istaraatiijiyadda imtixaanada deegaanka</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• 9/26 Agaasimayaasha iskaashiga waxay leeyihiin Horumarin Xirfadeed oo ku saabsan isu diyaarinta kulamadooda xogeed ee ugu horreeya ee dugsiyada.</li> <li>• 10/3 Wadahadalka Xogta READ Act ayaa bilaabmay 10/3. Xogta Bilowga Sannadka waxa la ururin doonaa Nofembar.</li> </ul> <p>Mudnaanta #2: Sameynta hal istiraatiijiyad imtixaaneed oo loogu talagalay dhammaan dugsiyada si loo fuliyo 2023-2024.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qoritaanka RFP-ka degmada.</li> <li>• Ka shaqaynta heshiis lala galo iibiye/adeeg-bixiye si loo tijaabiyo xulashooyinka suurtagalka ah.</li> </ul>

				<p>Qodobbada Hubinta Xogta ee 2022-23:</p> <p>Fasalada K-2 – Akhris-qoraalka Hore</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Kulamada xogta ee Agaasimayaasha Iskaashatada ah ayaa sida ugu yar diiradda saari doona READ ACT (3 jeer sannadkii) iyo qiimeynta cutubka xirfadaha aasaasiga ah ee billaha ah. Kulamo xogeedka waxaa sidoo kale laga yaabaa inay ku jiraan waxqabadka heerka ardayda ee imtixaanada qaabaysan ee manhajka.</li> </ul> <p>Fasalada 3-8 - Xisaabta iyo Akhris-qoraalka</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Ku-meelgaarada: Kulamada xogta ee Agaasimayaasha Iskaashiga waxay diiradda saari doonaan qaybaha mudnaanta leh ee la jaanqaada SLO-yada degmada waxaana lagu qiimeyn doonaan Qiimaynada Ku Meelgaarka ah.</li> <li>READ Act/I-Ready: Kulamo Xogeedka Agaasimayaasha Iskaashatada ayaa diirada saari doona READ Act/I-Ready ee loogu talagalay ardayda leh Qorsheyaasha READ Act marka lagu daro dhamaan ardayda fasalka 6aad.</li> </ul> <p>Fasalada 9-12 - Xisaabta iyo Akhris-qoraalka</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Dugsiyada leh fasallada 9-12 waxay yeelan doonaan ugu yaraan kulamo xogeed saddexdii biloodba mar ah oo ay yeelanayaan Agaasimayaasha Iskaashiga.</li> <li>Capstone: Kulamo xogeedka waxay diiradda saari doonaan waxqabadka heerka ardayda ee kartida lagu imtixaanay teeramkaas ee fasalka/koorsada iyada oo loo marayo Capstone.</li> <li>READ Act/I-Ready: Kulamo Xogeedka ayaa diirada saari doona READ Act/I-Ready ee loogu talagalay ardayda leh Qorsheyaasha READ Act marka lagu daro dhamaan ardayda fasalka 9aad.</li> </ul>
1.2.1a Sameey qeexitaanka iyo cabbirka waxbarashada si fiican u dhisan	Degmad u Maamu sho	Aan Khusey n	Aan Khu seyn	<p><a href="#">Hannaanka lagu Horumarinayo qeexitaanka iyo cabbirka waxbarashada si fiican loo soo koobay</a></p>

1.2.1a Sameey qeexitaanka iyo cabbirka waxbarashada si fiican u dhisan	Degmada Maamusho	Aan Khuseyn	Aan Khuseyn
--	------------------	-------------	-------------

## Guudmar

Kooxdayda waxay dejiyeen qorshe loogu talagalay nidaamka imtixaanka oo la jaan qaadaya heerarka gobolka. Inta aan ka gudbinayno cudurka safmareenka ah, waxaan fahamsanahay inay tahay inaan diirada saarno Caddeymaha (Body of Evidence) (BoEv) si aan u aruurino sawir dhamaystiran oo ku saabsan guusha ardayda. Dib-u-habayntayadii dhowayd ee Iskaashiga waxay noo ogolaanaysaa inaan ka faa'iidayano hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo degmada si aan si hufan u gaarno guusha yoolkan. Si taas loo gaaro, waxaan soo jeedinaynaa waxyaabahan soo socda oo si faahfaahsan ugu muuqda shaxda sare.

### Mudnaanta #1: Dib u eegista iyo xoojinta hirgelinta istaraatiijiyadda imtixaanada deegaanka.

- 9/26/22 Agaasimayaasha iskaashiga waxa loo tababaray hab-maamuuska shirar xogeedka dugsiyada.
- 10/3/22 Wadahadalka Xogeed READ Act ayaa bilaabnaya iyadoo la isticmaalayo borotokoolka cusub ee loo dhaqangeliyey dib u eegista xogta. Xogta Bilowga Sannadka waxa la ururin doonaa Nofembar.

### Mudnaanta #2: Sameynta hal istaraatiijiyad imtixaaneed oo loogu talagalay dhammaan dugsiyada si loo fuliyo 2023-2024.

- Kooxdu waxay diyaarinaysaa RFP-da degmada si ay hawshan u gaaraan/ugu guuleystaan. Waxaanu sharfaynaa oo aan ixtiraamaynaa dabacsanaanta Qoyska Dugsiyadeena waxaanu sidoo kale fahamsanahay baahida loo qabo yaraynta saamaynta cudurkii safmareenka uu ku yeeshey guusha ardayda.
- Waxaan ka shaqeyneynaa heshiis aan la galayno iibiye/adeeg-bixiye si aan u tijaabino xulashooyinka suurtagalka ah.

**Guud ahaan, dhammaan bartilmaameedyadii waa la gaaray.**

## 2021-22 Guulaha Kormeeraha Guud

Qaybtan waxaa ku jira guulaha Kormeeraha Guud inta lagu jirey sannad dugsiyeedkii 2021-22 iyo saamaynta guulahaas ay ku yeesheen DPS iyo bulshada DPS. Guulahan waxay dheeraad ku yihiin kuwa lagu sheegay Fasiraadda Macquulka ah iyo warbixinnada kormeerka ee la socday.

### Waafaqsanaanta iyo saamaynta Filashooyinka

#### E.1 Sinaanta

10/1/2021	Dib loogu magacaabay Xubin Guddida Sare Ka Tirsan ahaan iyo Khasnajiga Ururka Maamulayaasha iyo Kormeerayaasha Guud ee Latino	Dhisida isku xirnaanta/xiriirka shabakada qaranka ee Maamulayaasha iyo Kormeerayaasha Guud ee Latino	E-1 Sinaanta
10/21/2021	<a href="#">Iyada oo lala kaashanayo BoE, wuxuu hirgeliyay jaantuska edbinta si loo carqaladeeyo eexda isla markaana loola dagaallamo sinnaan la'aanta</a>	Yareynta dugsi ka cayrinta iyo ka hakinta waxbarashada ee ardaydeena aadka loo takooro	E-1 Sinaanta
12/10/2021	Qaybaha ikhtiyaariga ah ka saarista qaab-dhismeedka LEAP waxay muujinaysaa u Heellanaantiisa Sinnaanta		E-1 Sinaanta
6/28/2022	Mayoral Honoree - Soo dhawaynta Hogaamiyayaasha Afrikaan Ameerikaanka ah	Kordhinta xiriirka/isku-xirnaanta hogaamiyayaasha DPS	E-1 Sinaanta

#### E.2 Wax Barida iyo Wax Barashada

10/1/2021	<a href="#">Umeerinta heerka fasalka ah ee lagu bixiyo Deeqaha gargaarka COVID-Heer Sare Ah</a>	Ardaydu waxay heleen taageerooyin umeerin heer sare ah si loo yareeyo saamaynta COVID. Intaa waxaa dheer, waa markii ugu horeysay ee DPS ay gasho qandaraas ku salaysan	E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada
-----------	---	---	----------------------------------

	Cilmi-baarista umeerinta halkii ay ka ahaan lahayd heerka fasalka umeerin	natiijooyin. Tani waxay u ogolaanaysaa DPS inay lacag ku siiso qandaraaslayaasha iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka halkii lagu saleyn lahaa ballanqaadka waqtiga. DPS waa degmo dugsiyeedka hogaanka haysa iyadoo isticmaalaysa cilmi-baarayaasha Jaamacadda Harvard si ay uga caawiyaan agabyada wax ku ool ah oo ku aadan heshiisyada/qandaraasyada ku saleysan natiijooyinka.	
10/1/2021	<a href="#">Wararka Maraykanka &amp; Warbixinada Aduunka (US News &amp; World Report) ayaa laba dugsi hoose iyo dhexe ee DPS ku xisaabiyey 10ka ugu sareeya ee Colorado, iyadoo Dugsiga Hoose ee Polaris ku qiimeeyey kan ugu sarreeya gobolka! Dugsiga Hoose ee Cory ayaa isna soo galay 10ka ugu sareeya!</a>	E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada	U heellanaanta heerka sare ee tacliinta
4/29/2022	<a href="#">Mashiinka iibinta buugaagta DPS ee ugu horeyay</a>	Wuxuu muujiyey sida ay uga go'an tahay hal-abuurnimada iyo akhris-qoraalka.	E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada
6/1/2022	Isku-Xirka Xagaaga oo la Ballaariyey oo hore loogu yeeri jirey Akademiyada Xagaaga)	Arday badan ayaa fursad u heshay barnaamijka xagaaga si ay wax uga qabtaan waxbarashadii uga luntay COVID	E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada

### E.3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha

11/18/2021	Wuxuu Xuquuqda TECDA siiyey Maamulayaasha	Iyadoo lala kaashanayo DSLA. Tusaale u ah hogaaminta wada shaqeynta ku dheexan	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
12/16/2021	Wuxuu asaasay Gole Iskaashi oo dhab ah halkaas oo shuraakada Jaatarka ay miiska isugu yimaadeen si ay u tixgeliyaan xiritaanka iyo/ama xoojinta dugsiyada	Tusaale u ah hogaaminta wada shaqeynta ku dheexan	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
2/8/2022 3/11/2022	Iyada oo laga jawaab celinayo hannaanka Dib-u-qaabeynta Montbello, (1) wuxuu macalimiintii hore ee Montbello siiyey xuquuqda koowaad si looga qaado	Xushmeeyey dhaxalka macalimiinta iyo shaqaalaha Montbello isagoo sameeyey ballan qaadyo xagga go'aan qaadashada ah. Iyadoo lala kaashanayo Aagagga Hal-abuurka	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha

	waraysiyada jagooyinka cusub ee Montbello ee ay codsadeen ayna u qalmaan; (2) wuxuu hirgeliyey Guddi Shaqaale (halkii ay ka ahaan lahayd go'aanka maamulaha) si ay u doortaan musharraxiinta jagooyinka bannaan ee lagu daboolayo DCTA; iyo (3) wuxuu bixiyey \$2,000 oo gunnada haynta macallimiinta ah iyo SSP-yada ay saamaysay habka iskaashiga ee ka dhashay dib-u-midaynta. Wuxuu Sanadaha Tijaabada Ah Ee Adeegga siiyey Macallimiinta Dugsiyada Hal-abuurka		E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
8/19/2021	<b>Xafladda Xerada Soo Dhoweynta Xayawaanka</b>	Bilaw wanaagsan - Kordhinta Moraalka Shaqaalaha	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
1/1/2022	<b>100% u hoggaansan Sharciga Tallaalka Magaalada Denver - shaqa-bixiyaha ugu weyn ee Denver</b>	Wuxuu gacan ka geystay ku noqoshada 100% waxbarashada qof ahaan looga xaadiro	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
3/21/2022	<b>Wuxuu Guddiga u sameeyay Xaddidaadaha Fulinta oo dib loo eegay: Siyaasadda Xaddidaadaha Fulinta</b>	Wuxuu wax ka qabtay faraqa ka jira kooxaha shaqaalaha oo ay ugu wacan tahay xiisadda ka jirta nidaamka	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
	<b>Soo jeedinta Xuquuqda iyo Ilaalinta Macallimiinta</b>		
4/24/2022	<b>Loo soo bandhigay sidii "Hogaamiye Wax Ka Barasho Mudan" xilligii Shir-sannadeedka Hal-abuurka Waxbarashada ee Machadka</b>	Kordhinta xiriirka/isku-xirnaanta hogaamiyayaasha DPS. Tusaale u ah shaqaalaha hoggaanka DPS	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
5/11/2022	<b>Si guul leh wax uga beddelay SB197 iyada oo la raacayo garqaad aan sharci ku xirnayn</b>	Si guul leh ayuu iskaashi ula yeeshay sharci-dejiyeyaasha	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
6/7/2022	<b>Waxaa lagu martiqaaday inuu bandhig ka sameeyo taxanaha isku xirka "Compadres" ee u dambeeyay ee Ururka Maamulayaasha iyo Kormeerayaasha Guud ee Latino isagoo ka hadlay ka shaqaynta guud</b>	Kordhinta xiriirka/isku-xirnaanta hogaamiyayaasha DPS	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha



	ahaan daneeyayaasha si loo burburiyo nidaamyada cadaadiska		
6/10/2022	Wuxuu iskaashi la sameeyey CASE isaga ka dhigay DPS xubinnimadeeda ugu weyn - taasoo keentay in maamulaha ugu horreeya sanadka la aqoonsaday in ka badan 20 sano - Sheldon Reynolds		E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha
4/14/2022	Wuxuu shakhsi ahaan gacan uga gaystay in mudnaanta dugsiyada la siiyo caqabadaha shaqaalaha ee COVID isaga oo shakhsi ahaan ugu heellanaa shaqaalaha xafiiska dhexe in loo qoondeeyo dugsiyada	Iskaashiga muhiimka ah ee hogaamiyayaasha DPS Kordhinta xiriirka/isku-xirnaanta hogaamiyayaasha DPS	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha. Horumarinta Xirfadlaha
1/7/2022	Waxaa Lagu Casuumay Kooxda Hogaaminta Dhaqaalaha Loo Dhanyahay ee Colorado	Wuxuu muujiyay sida ay uga go'an tahay in dugsiyadu furnaadaan wuxuuna tusaale u noqday shaqaalaha.	E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha

#### E.4 Caafimaadka iyo Badbaadada

8/30/2021	Dhammaan kalkaaliyayaasha wakhtiga buuxa shaqeyta ee la shaqaaleysiiyay intii lagu jiray Sanad Dugsiyeedkii 21-22 waxay heleen \$2,000 gunno shaqo soo gelis ah	Si aan u kordhino ballan qaadkeena ujeedooyinka caafimaadka iyo badbaadada.	E-4 Caafimaadk a iyo Badbaadada

#### E.5 Qalinjabinta Kadib iyo Jinsiyadda Caalamiga ah

6/1/2022	Waxaa La Gudoonsiiyey Deeqda Waxbarasho Sahminta Magaalooyinka oo ay bixiyeen Iskaashatada Magaalada Downtown	Kordhinta wacyigelinta shabakadeed ee Iskaashiga Bulshada	E-4 Caafimaadk a iyo Badbaadada
9/7/2021	Waxaa doortay Guddoomiye Polis si uu ugu adeego Komishanka Waxbarashada Khibrada Ganacsiga (BEL)	Himilada Komishanka BEL waa in la isku daro fursadaha waxbarasho ee khibrada leh iyo shabakada horumarinta hibada ee Colorado.	E-5 Qalinjabint a Kadib iyo Jinsiyadda Caalamiga ah

## E.6 Waaritaanka

10/5/2021	<a href="#">Wuxuu dhegax dhigey gurigii cagaaranaa (greenhouse) ee ganacsi ee ugu horreeyay ee degmada ku salaysan</a>	Wuxuu muujiyey sida ay uga go'an tahay waaritaanka iyo ficilada ku lug leh isbeddelka cimilada.	E-6 Waaritaanka
1/27/2022	Wuxuu daaha ka qaaday baskii ugu horeeyay ee korontada ku shaqeeya ee dugsiga	Wuxuu muujiyey sida ay uga go'an tahay waaritaanka iyo ficilada ku lug leh isbeddelka cimilada.	E-6 Waaritaanka

## Isku-Waafajinta Dhowr Bayaano oo Filashooyinka ah

3/27/2022	Wuxuu Khudbar Muhiim ah ka soo jeediyey Shirka Guga Waxbarashada RTM		
6/21/2022	<a href="#">Gaaritaanka Akadeemiyada Wanaagsan ee loogu talagalay ardayda fasalka 9aad</a>	Barnaamijka isku xirka xagaaga ee loogu talagalay ardayda midabka leh	E-1 Sinaanta, E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada
8/30/2021	Si uu iskugu dayo wax ka qabashada yeraanshaha macallimiinta, (1) wuxuu kordhiyey sicirka mushahaarka macallimiinta oo ahaa \$111.12 maalintii kana dhigey \$160 maalintii ee macallimiinta kabka ah iyo \$200 maalintii macallimiinta shatiga haysta ah; (2) wuxuu bixiyey beddelka lacagta shatiga ee shaqaalaha; iyo (3) wuxuu lacag ahaan u dhiirageliyey shaqaalaha xafiiska dhexe si ay mutadawac ahaan u noqdaan macalinka kabka ah.		
9/1/2021	Waxa lagu martiqaaday Kooxaha Hawlaha Qaranka waxaana ku	Muujiyay sida ay uga go'an tahay heerka sare ka dhigista tacliinta iyo	

	<p>martiqaaday Golaha Dugsiyada Magaalada Weyn</p> <p>Kooxda TUDA waxay bixisaa cabir muhiim ah oo ku aadan guusha ardayda marka la joogo gudaha Maraykanka. Xagga xisaabta, akhriska, sayniska, iyo qorista, guulaha tacliimeed ayaa laga soo warbixiyaa degmooyinka la doortay ee magaaloooyinka iyo sidoo kale qaranka waxayna bixisaa xaalada guud ee ku saabsan sida DPS u shaqaynayso marka loo eego degmooyinka la midka ah ee dugsiyada magaalada.</p> <p>E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada E-1 Sinaanta, E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha</p>	<p>badqabka shaqaalaha inta lagu jirey wakhtiga dhibaataada</p>	
11/8/2021	<p>Dhammaan Kalkaaliyaasha wakhtiga buuxa shaqeeya ee DCTA ee hogaaminayay ka jawaab celinta COVID-19 ee dugsiyada waxay heleen lacag dhan \$2,000 oo mushahar ah xilligii Diisambar 22, 2021 maadaama ay gacan ka geysteen taageerada borotokoolka COVID-19 ee sanad dugsiyeedkii 21-22.</p>	<p>Muujiyay sida ay uga go'an tahay heerka sare ka dhigista tacliinta iyo badqabka shaqaalaha inta lagu jirey wakhtiga dhibaataada</p>	<p>E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada, E-1 Sinnaanta, E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha</p>
11/8/2021	<p>Si wax looga qabto ka sii daritaanka yeraanshaha macalinta kabka ah oo uu sabab u ahaa cudurkii safmareenka ahaa, Kormeeraha guud wuxuu kordhiyay heerka caymiska fasalka ee mushaharka macalimiinta oo ahaa \$26.29 kana dhigey \$35.00 Sanad dugsiyeedkii 21-22.</p>	<p>Muujiyay sida ay uga go'an tahay heerka sare ka dhigista tacliinta iyo badqabka shaqaalaha inta lagu jirey wakhtiga dhibaataada</p>	<p>E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada, E-1 Sinnaanta, E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha</p>

3/25/2022	1,869 Arday oo DSF ah! Tani waa tiradii ugu badneyd ee ardayda DSF tan iyo aasaaskii DSF ee 2006, iyadoo tiradii ugu badnayd ee ku xigta ay ahayd 2017-18, wadar ahaan 1833. Ma aha oo kaliya in tiradani lafteeda ay tahay mid laga naxo, oo waxay mudan tahay amaan xilli heerarka is-diiwaangelinta kulliyadaha qaranku ay hoos u dhacayaan. Waxaan si toos ah uga hortagaynaa isbeddelkaas!	Wuxuu muujiyay sida ay uga go'an tahay guusha tacliinta iyo guusha guud.	Sinnaanta, E-3 Ardayga iyo Shaqaalaha
6/8/2022	Wuxuu dhamaan hogaamiyayaasha dugsiga siiyey gunnooyinka COVID maadaama ay dadaalkooda dhaafsiiyeen waajibaadkooda	Wuxuu aqoonsadaa ballanqaadyada hoggaaminta dugsiga	E-2 Wax Barida iyo Wax Barashada  E-3 Badqabka Ardayga iyo Shaqaalaha E-4 Caafimaadka iyo Badqabka
8/25/2021	Wuxuu sameeyay ee Golaha Fulinta Hawlaha Kormeeraha Guud iyo Golaha Kormeeraha Guud	Wuxuu sameeyay qaab-dhismeed hoggaamineed si loo fuliyo qorshaha istaraatiijiyadeed ee cusub.	E-1 ilaa E-5
	1 Dhammaystiray Barnaamijka Dhegeysiga & Wax Ka Barashada	Gacan ka geystay fikrad ku biirinta qorshaha istaraatiijiyeed, wuxuuna si toos ah gacan uga gaystay baahida loo qabo kooxda Ku-meelgaarka ah ee gudaha/dibadda	E-1, E-2, E-3, E-4, E-5
	1 Aasasay Koox Ku Meelgaar ah	Kooxda Ku-meelgaarka ahi waxay bixiyeen 10 Mudnaan si ay gacan uga geystaan hagaajinta qorshaha istaraatiijiyeed	E-1 ilaa E-5
1/15/2022	Wuxuu aasaasay Kooxda La-talinta Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee cusub	Wuxuu gacan ka gaystay hagaajinta qorshaha istaraatiijiyeed	E-1 ilaa E-5
4/24/2022	Waxaa lagu abaalmariyay abaalmarinta "Maamulaha ugu geesnimada badan" ee Machadka Hal-abuurka Waxbarasho ee Sannadlaha ah	Kordhinta xiriirka/isku-xirnaanta hogaamiyayaasha DPS	E-1 ilaa E-5
4/28/2022	Wuxuu aqoonsi sharafeed ka helay Ururka Xiriirka Dadweynaha ee Dugsiga Colorado (COSPPA) 2022 Wanaajinta Isgaarsiinta iyo Abaalmarinta Xirfadlayaasha.	Kordhinta xiriirka/isku-xirnaanta hogaamiyayaasha DPS	E-1 ilaa E-5

	<p>Barnaamijkan waxa uu aqoonsanayaa heerka sare ee qorshaynta, fulinta iyo qiimaynta xiriirka dadweynaha. Ololaha loogu magacdaray "Barnaamijka Dhageysiga iyo Wax Ka Barashada ee 100-ka Maalmood ah ee Kormeerka Dr. Alex Marrero," waxa uu ku mutaystay Abaalmarinta Horumarka Dahabiga ah.</p>		
5/1/2022			
6/2/2022	Xafiisyada Dhexe Oo Dib Loo Habeeyay	Waxay sababta \$9M oo kayd/baaqi ah. Tallaabo muhim ah oo wax looga qabanayo agabyada loogu talagalay qorshaha istaraatiijiyadeed ee cusub.	E-1 ilaa E-5
6/6/2022	<p>Wuxuu booqday 202 dugsi oo DPS ah intii lagu jirey "Dhamaadkii Sanadka Qoyska Dugsiyada - Juun Universal ee Beerta Botanic</p> <p>Waxay abuurtay habraac iyo shuruudo lagu dhimayo diiwaangelinta ardayda ee sii yeraanaysa ee ay bulshadu hogaamiso, degmadana ay taageerto</p>	<p>Waxaan leenahay shuruudo gaar ah oo loogu talagalay xiritaanka dugsiyada wixii hadda ka dambeeya</p> <p>Lagu dhamaystirey sanad gudihiis! Wuxuu fariin adag u dirayaa maamulayaasha</p> <p>Si guul leh loo dhammeystay sanadkiisii ugu horeeyay ee ka Kormeeraha Guud ahaan</p>	<p>E-1 ilaa E-5</p> <p>E-1 ilaa E-5</p> <p>E-1 ilaa E-5</p>

## Lifaaqa

### Warbixinada Kormeerka oo dhamaystiran

- [RI.1 - Warbixinta Kormeerka Sinaanta - Meey 2022](#)
- [RI.2 - Warbixinta Kormeerka Wax Barista iyo Wax Barashada - Agoosto 2022](#)
- [RI.3 - Warbixinta Kormeerka Badqabka Ardayda iyo Shaqaalaha - Juun 2022](#)
- [RI.3 - Warbixinta Kormeerka Fayoqabka Ardayga iyo Shaqaalaha - Agoosto 2022](#)
- [RI.4 - Warbixinta Kormeerka Caafimaadka iyo Badbaadada - Meey 2022](#)
- [RI.4 - Warbixinta Kormeerka Caafimaadka iyo Badbaadada - Juun 2022](#)
- [RI.5 - Warbixinta Kormeerka Qalinjabinta iyo Jinsiyadda Caalamiga ah - Juun 2022](#)
- [RI.5 - Warbixinta Dabagalka Qalinjabinta iyo Jinsiyadda Caalamiga ah - Agoosto 2022](#)

## Tafsiirka Macquulka Ah

- [RI.1 Fasiraadda Macquulka ah ee Sinaanta Meey 2022](#)
- [RI.2 Wax Barida iyo Wax Barashada Juun 2022](#)
- [RI.3 Badqabka Ardayda iyo Shaqaalaha Meey 2022](#)
- [RI.4 Caafimaadka iyo Badbaadada Meey 2022](#)
- [RI.5 Qalinjabinta Kadib iyo Jinsiyadda Caalamiga ah Meey 2022](#)